

Australian Government

# Dhalashada Australia

## Waxa isku-keen xiriiriya



Dhamaan macluumaadka aad u baahan tahay si aad ugu fariisato imtixaanka dhalashada wuxuu ku yaallaa buuggaan. Lagaagama baahna inaad ka gadato ama ka hesho qoraallada kale ee dhalashada shakhsiyaad ama ururo si aad ugu gudubto imtixaanka dhalashada. Wasaaradu ma ansixinayso kuna talin mayso qoraallo sheeganaya inay kaa caawimayaan inaad ku baasto imtixaanka dhalashada.

© Commonwealth of Australia 2020

Marka laga reebo Commonwealth Coat of Arms, dhamaan waxyaabaha lagu soo daabacay daabacaadan waxaa lagu bixiyaa hoosta hal abuurka halbawlaha u ah 4.0 shatiga caalamiga ah ee https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/legalcode.

Tan macnaheedu waa liisankani kaliya wuxuu khuseeyaa waxyaabaha sida ku qeexan dukumintigan.

Faahfaahinta shuruudaha liisanka lagama maarmaanka ah waxaa laga heli karaa bogga internetka ee 'Creative Commons' oo ah bogga internetka ee ah: https://creativecommons.org/ sidoo kale waa lambarka sharciga ee buuxa ee loo yaqaan CC BY 4.0 shatiga https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/legalcode.

**Isticimaalka Coat of Arms.**
Shuruudaha lagu isticimaali karo Coat of Arms ayaa lagu sharxey websaadka ee Waxaada xafiiska Madaxa Dawlada iyo Xubnaha Wasiisrada- https://www.pmc.gov.au/government/commonwealth-coat-arms

**Nagala soo xidhiidh.**
Faahfaahinta laxidhiidha liisanka iyo adeegsiga dukumintigaan ayaan soo dhaweyneynaa:

Portfolio Media iyo Laanta Kaqeybgalka
Arimaha Gudaha
PO Box 25
BELCONNEN ACT 2616

**Afeef Akhristayaasha**
Aborijinaalka iyo Torres Strait Island waxaa looga digayaa in qoraalkan ay ku jiraan muuqaalo iyo/ama erayo la xidhiidha dad dhintay.

# Tusmada


Farriin adiga ku socota 2

## Qaybta la isku imtixaani karo

Qaybta 1: Australiya iyo dadkeeda 7

Qaybta 2: Habka Dimoqraadiga ah ee Australiya waxaa uu aaminsan yahey, xuquuqda iyo xoriyada 17

Qaybta 3: Dawlada iyo Sharciga ee Australiya 23

Qaybta 4: Qiyamka Australiya 33

Erayada la sharxay oo qaybta la isku imtixaani karo 40

## Qaybta aan la isku imtixaani karin

Qaybta 5: Australiyada maanta 48

Qaybta 6: Taariikhdeena Australiya 63

Erayada la sharxay ee qaybta aan la isku imtixaanayn 84

Macluumaad intaas ka badan 86

Aqoonsiyada 88

# Farriin kugu socota

Waxaan kaaga hambalyeynaynaa inaad doorotay in aad noqoto muwaadin Australian ah. Waxay u baahan tahay dhiirinaan, da'daal iyo ka go'naan inaad ku noolaato wadan cusub si buuxdana uga qaybgasho muwaadin ahaan. Waan qiimeyneyanaa doorka aad kaqaadeysid nabad iyo dimoqraadiga bulshada.

Dhalashada Australia waa talaabo muhiima oo taariikdaada muhaajirnimo. Noqoshada Australian macneheedu waxa weeye inaad u samaynayso ballanqaad joogto ah Australiya iyo qayimka aan wadaagno. Sidoo kale waa bilawga xubinnimadaada rasmiga ah ee bulshada Australiya. Waa taalabo kuu ogolaanaysa inaad tiraahdo waxaan ahay 'Australiyaan'.

Dhalashada Australiyaa waa mudnaan ku siinaysa abaalgudyo badan. Inaad noqoto muwaadin Australiyaan ah, waxaad ka mid noqonaysaa bulsho qaraneed oo gaara. Dalkeenna waxaa lagu dhisay tabarucaada dadka Aborjuniiska ah iyo Torres Strait Islander, hey'adaha dimoqraadiga ah ee aan ka dhaxalnay Ingiriiska, iyo soogalootiga ka yimid adduunka oo idil. Waxaan u dabaaldegnaa kala duwanaanshaheena, isla mar ahaantaana waxaan ku dadaalnaa qaran mideysan oo is waafaqaya.

Awooda bulshada Australiya macneheedu waxa weeye in aan u wada shaqayno wadajir u xalinta iyo in laga dhigo Australiya wadanka weyn ee uu yahay. Waxaan leenahay nadaam degan oo dawladeed dadka Australiyana waxay ixtiraamaan awooda iyo qaanuunka xukuumada. Deganaanshaheena, dhaqankeena iyo sharcigeena waxaa qaabeeyey taariikhdeena. Inaad ka mid ahaato bulshada Australia, waxay ku dhaxal siin doontaa taariikhdaan waxaadna joogi doontaa jago aad door ka qaadato.

Australia waa dhul fac weyn. Waa dhul weyn oo gaar ah. Waa wadan leh dhul-roobaad iyo dhul-dhireed; leh xeebo dahabi ah iyo dhul qalalan oo lama degaana. Dhaqamadeena asaliga ah waa kuwa ugu weyn dhaqamada adduunka. Waxaan sidoo kale nahay qaran dhalinyaro ah; ummad muhaajiriin ah. Degitaanka reer Yurub ee Australiya wuxuu bilaabmay 1788 waxaanan sii wadaynaa soo dhaweynta soogalootiga cusub maanta.

Dadka ka kala yimid in kabadan 200 oo dal ayaa Australiya ka dhigtay hoygooda. Sidaas darteed, bulshadeenu waa mida ugu noocya badan qawmiyad ahaan. Australiya waxay si guul leh isugu daraysaa kala duwanaanshaha qowmiyadeed iyo dhaqan iyo midnimo qaran. Dhalashadu waa waxa mideeya dhamaanteen.

Australia waa dimoqraadi. Dhalashadu waxay ku siisaa fursada aad si buuxda ugaga qaybgasho dhisida ummadeena demoqraadiga ah. Taas macneheedu waxa weeye waxaad diyaar u tahay fulinta masuuliyaadkaaga si qof ka mid ah bulshada Australia. Dadka reer Australiya waxay aaminsan yihiin qiyam la wadaago iyo xoriyada qof walba, iyo fursad siman loogu talagalay naagta iyo dumarka iyo xukunka sharciga. Dhalashada Australiya waxay ku saabsan tahay ku noolaanshaha qayimkaas nolol maalmeeddkaaga.

# Noqoshada muwaadin Australiyaan ah

Noqoshada muwaadin Australiyaanka ah waa hab muhiim ah oo qofku u ballanqaadayo daacadnimadiisa Australiya iyo dadkeeda, ka dibna xaq u leh inuu ku isticmaalo xuquuqdiisa iyo waajibaadkiisa muwaadin ahaan umaddeena.

## Qaybta la isku imtixaani karo

Imtixaanka muwaadinka Australiyaanka ah imtixaanka muwaadinka Australiyaanka ah waxaa loogu talagalay in lagu qiimeeyo inaad leedahay aqoon wanaagsan oo Australiyaana iyo masuuliyaadka iyo mudnaanta muwaadinimada.

Imtixaanka dhalashada ayaa ah kumbiyuutar ku saleysan, oo ah su'aalo doorasho dhowr ah oo af Ingiriis ah. Waxay ka kooban tahay 20 su'aalood oo si aan kala sooc lahayn loo xushay; iyo laga bilaabo 15 Noofembar 2020, sidoo kale waxaa ku jiri doona shan su'aalood oo ku saabsan qiyamka Australiya.

Si aad imtixaankaas ugu guulaysato, waxaa waajib kugu ah inaad si sax ah uga ka jawaabto 75 boqolkiiba, ama 15 su’aallod 20ka su’aallod.

Imtixaanka dhalashada waxaa lagu qaadaa Xafiisyada Waxaada Socdaalka iyo Dhalashada oo ku kala yaalla wadanka. Jadwalka imtixaanka waxaa lagu galaa meella badan oo ku yaalla wadanka Australia iyo dibadaba.

## Isu diyaarinta imtixaanka dhalashada Australiya

Si aad u diyaariso imtixaanka dhalashada waxaad u baahan doontaa buuggaan macluumaadka awoodgelinta. Waxa aan wadaagno:

Buuggaan awoodgelinta waxaa ku qoran su’aallo la isku imtixaani karo iyo kuwa aan la isku imtixaani karin.

### Qaybta la isku imtixaani karo

Dhamaan macluumaadka aad u baahan tahay si aad ugu fariisato imtixaanka dhalashada wuxuu ku yaallaa buuggaan.

- Qaybta 1 – Australia iyo dadkeeda
- Qaybta 2 – Caqiidada Dimoqraadiga ah ee Australiya, xuquuqda iyo xoriyada
- Qaybta 3 – Xukuumada iyo sharciga Australiya
- Qaybta 4 – Qiyamka Australiya

Waxaad u baahan doontaa inaad ogaato oo aad fahamtid macluumaadka qaybta la isku imtixaami karo si aad uga jawaabtid su'aalaha imtixaanka dhalashada.

### Qaybta aan la isku imtixaani karin

Qaybta aan la isku imtixaani karin oo ku caawimaysa si aad u fahamtid taariikhda iyo dhaqanka Australia. Lagugu imtixaani maayo macluumaadkaan.

- Qaybta 5 – Australiyada maanta
- Qaybta 6 – sheekada Australiyadeena

### Su’aallaha la baranayo

Dhamaadka qaybta la isku imtixaani karo, waxaa ku yaalla 20 su’aallood oo la baranayo si ay kuugu diyaariyaan imtixaanka dhalashada.

### Erayo la qeexayo

Waxaa jira erayo la qeexayo (liiska erayada waaweyn iyo macnahooda) oo dhamaadka qaybta kuwa la isku imtixaani karo iyo kuwa kale.

### Macluumaad intaas ka badan

Dhabarka buugga macluumaadka, waxaad ka heli kartaa talo ku saabsan halka aad ka heli kartid macluumaad dheeraad ah.

### Caawimada markaad samaynayso imtixaanka dhalashada

Waxaa la filayaa in inta badan dadka doonaya inay muwaadin Australiyaana noqdaan ay leeyihiin xirfadaha aqoonta loo baahan yahay oo muhiimka u ah imtixaanka dhalashada iyaga oo aan la caawimayn. Teknolojiyada hadalka, oo aad u adeegsan kartid dhageysiga su'aalaha iyo xulashada jawaabaha, ayaa sidoo kale la heli karaa.

### Imtixaanka dhalashada Australiya kadib

Haddii aad ka gudubtid imtixaanka, waxaan sii wadaynaa howsha arjigaaga. Haddii dalabkaaga la oggolaado oo lagaa doonayo inaad ka qeybgashid xafladda dhalashada, waxaad heli doontaa warqad martiqaad ah oo aad ku imaaneysid xafladda. Guud ahaan, xafladdaada waxaa lagu qaban doonaa lix bilood gudahood laga soo bilaabo markii dalabkaaga la oggolaado.

# Ballanqaadka muwaadiniinta reer Australia

Waa muhiim in muwaadiniinta reer Australiya ay fahmaan xuquuqda iyo masuuliyadeena iyo waxa macneheedu yahay inaad tahay muwaadin, ama aan ahaano kuwa ku dhashay wadanka ama aan doorano dhalashada. Tani waxay muhiim u tahay horumarka qarankeena.

Markaad timaado munasabada dhalashada Australia, waxaad samayn doontaa ballanqaadka soo socda.

Markaad sidaas samayso, waxaad samaynaysaa ballanqaad Australia waxaadna aqbalaysaa masuuliyada iyo mudnaanta dhalashada.

Waa kanaa ballanqaadka aad samayn doonto:

***Wakhtigan laga bilaabo, Ilaahey hortiisa,****

***waxaan ballan qaadayaa daacad u ahaanta Australiya iyo dadkeeda,***

***waxaana la wadaagayaa rumeynta dimuqraadiyadeeda,***

***waxaan ixtiraamayaa madaxbanaanideeda iyo xuquuqdeeda,***

***waana adeeci doonaa oo ilaalin doonaa sharcigeeda.***

Qof ayaa laga yaabo in uu doorto in uu isticmaalo ama aanu isticmaalin ‘illaahay hortiis”.

Markaad akhriyayso buuggaan, waxaad si buuxda u heli doontaa macnaha ka dambeeya dhaarta iyo sida aad u xoojin karto doorkaaga bulshada Australia.Farriin kugu socota



# Munaasabada dhalashada Australia

Munaasabadaha dhalashada Australia waxay noqon kartaa mid yar, oo dhowr qof keliya ay ka qaybgalayaan, ama waxay noqon kartaa mid balllaaran, oo boqolaal ama kumaankun qof ka qaybgelayaan. Qota dheerida dareenka iyo hanka muwaadiniinta cusub iyo masuuliyiinta ayaa ka dhiga dabaaldega mid aad u farxad badan.

Bilawga munaasabada dhalashada, waxaa laga yaabaa inuu ku soo dhoweeyo qof ka socda dadka asaliga ah kaas oo ka tirsan dadka dhaqan ahaan u leh dhulka aad degan tahay. Hab-maamuuskan Soo-dhaweynta ah oo ay ku dhaqmayaan dadka asaliga ah Australiyaanka ah dhulkooda caadiga ah kumanaan sano. Waxaad maqli doontaa erayo iyo soo dhowayn iyo dhiirigelin ka imanaysa hogaamiyayaasha bulshadaada ama wakiilada xukuumada.

Waxaad kor u akhriyi doontaa ama ku celinaysaa Balanqaadka dhalashada Australia iyada oo la akhriyaya kuwa kale oo doortay inay noqdaan Australiyaan. Qaybtaas ayaa ah midda ugu muhiimsan munaasabada. Noqon mayso muwaadin Australiyaana ilaa aad samayso u dhaarashada Australia.

Waa lagugu soo dhowaynayaa inaad soo qaadatid kitaab ama qoraal diimeed oo kale oo qabsatid markaad dhaarta samaynayso.

Hogaamiyayaasha bulshadaada ama wakiilada xukuumada ayaa hadal gaaban ka samayn doona macnaha ay leedahay dhalashadu. Waxaad helidoontaa shahaadada dhalashada Australia waxaa iyadana laga yabaa inaad hesho hadiyad yar oo bulshada ka timid. Qof walbaa wuxuu ku heesi doonaa heesta qaranka oo ah 'Advance Australia Fair'. Dhamaadka xaflada dhalashada ka dib, waxaad haysataa fursada aad kula dabaal degto muwaadiniintaada Australiyaanka ah.

Waxaanu kuu rajeynaynaa guul inaad noqotay Australian iyo inaad ku noolaato nabad iyo nolol wax ku oolla Australia.

## Macluumaad intaas ka badan

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan sida lagu noqdo muwaadin Australiyaan ah, booqo websaytka dhalashada Australia oo ah www.citizenship.gov.au.





# Dhamaadka su’aallaha la isku imtixaani karo



# QAYBTA KOOWAAD

## Australia iyo dadkeeda

# Australia iyo dadkeeda

Munaasabada dhalashada, waxaad ballanqaaday inaay daacad u ahaanayso Australia iyo dadkeeda. Sidaas darteed waa muhiim inaad fahamto Australia dadkeeda, oo ay ku jiraan hidaha dadkii asaliga ahaa. Sidaas oo kale waa muhiim inaad fahamto taarikhda Australiya soo martay laga soo bilaabo xilliga Ingiriisku maamulayey ilaa ay ka noqotay wadan leh dhaqamo kala jaadjaad ah oo hor u socda.

Qaybtaan, waxaad akhriyi doontaa qaar ka mid ah waxyaalla ku saabsan munaasabadaha doorka ka qaatay taariikhdeena. Maclumaadka dawlad goboleeyada iyo territoriskeena, iyo macluumaadka dhaqamada iyo astaamaha aan ku faani karo inay yihiin Australiyaan.

## Aborijinaalka iyo dadka jasiiradaha ka yimid.

Dadkii ugu horreeyey oo soo dega Australia waxay ahaayeen Aborijins iyo dadka jasiiradaha ka yimid.

Taariikh ahaan, dadka Aborijiniska ah badankood waxay ka yimaadeen dhulweynaha Australia iyo Tasmania. Diiwaanka taariikhiga ah ayaa muujinaya in dadka Aborijiniska ay yimaadeen Australiya inta u dhaxaysa 65,000 iyo 40,000 sano ka hor; si kastaba ha noqotee, dadka Aborijiniska ah waxay aaminsan yihiin inay udub dhexaad u yihiin sheekooyinka abuuritaanka dhulkan, sheekooyinka abuuriskooduna waxay bilaabmeen bilowga waqtiga. Torres Strait Islanders waxay ka yimaadeen jasiiradaha u dhexeeya dhakada Queensland iyo Papua New Guinea iyo jasiiradaha kale ee Pacifiga.

Dadka asaliga ahi waxay wadagaan dhaqan iyo caqiido weli noloshooda hagta ilaa maanta. Waxay si aad ah ugu xidhan yihiin dhulka taas oo ku sharxan sheekooyinkooda, farsahaxankooda iyo qoob ka ciyaarkooda. Dhaqamada asaliga ah waa kala jaad yihiin waana qeyb muhiim ah aqoonsiga qaranimada Australiya.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan dadka asaliga ah iyo Torres Strait Islander waxaa laga heli karaa *Part 5, Australiya maant iyo Part 6, Taariikhdeena Australia*.

## Maalmihii ugu horreeyey oo degitaanka Yurubiyaanka

Degitaankii yurubka wuxuu bilawday markii 11 markab oo dembiilayaal ah, oo noqday kuwa loo yaqaan “Kooxdii ugu Horreysay” ay ka yimaadeen wadanka Ingiriiska 26kii Janaayo 1788.

Waqtigaas sharciga Ingiriisku wuxuu ahaa mid xun jeelashana laguma hayn karin dadka dembigay galeen loo xiray. Si loo xalilo dhibaatadaan, Dawlada Ingiriisku waxay go’aansatay inay u rarto dembiilayaashaan adduunyada dhinaceeda kale; dhulka cusub ee ku yaallay New South Wales.

Wakiilkii boqorada ee ugu horreyey ee New South Wales wuxu ahaa Dhame Arthur Phillip. Deagaanku waa badbaaday, markii ay sii bateen maxaabiistii la keenayey iyo degayaalkii cusbaa, way korortay horay ayeyna u martay. Meela badan oo la degay ayaa laga asaasay dalka intiisa kale.

Dadkii ugu horreeyey oo xorta ahaa waxay ka yimaadeen Ingiriiska iyo Ireland. Dadka Ingiriiska iyo Irishka ah iyaga ayaa saamayn weyn ku sameeyey taariikhda, dhaqanka iyo siyaasada.

Sanadii 1851, dahab ayaa waxaa laga hellay meelaha la degay ee ku yaalay New South Wales iyo Fiktooriya. Dadka ka kala yimid adduunka ayaa meelahaas degay si ay u tijaabiyaan nasiibkooda. Jayniis badan oo xilligaas yimid ayaa ahaa kuwii ugu badnaa oo ka yimaadaa meel aan yurub ahayn. Mudo ka yar 10 sanadood, waxaa laban laabmay dadkii.



# Ummada Australia

Sanadii 1901, degaanadii ayaa la mideeyey waana la isku daray waxaana loogu yeeray Dawlada Australia. Waxay ahayd waqtigan markii hay'adaheena dimuqraadiga ah ee qaranka, oo ay ku jiraan baarlamaankeena qaran, dowlada iyo maxkamada sare lagu aasaasay dastuurka cusub ee Australiya. Sanadii 1901, dadka Australiya wuxuu dhamaa hal milyan oo qof. Lambarkan kuma jiro dadka Aborijiniska iyo Torres Strait Islander, maadaama aaney ahayn ilaa afti laga qaaday 1967 in lagu daro qiyaasaha rasmiga ah ee dadka Australiyaanka ah.

Barkii ugu horreyey qarnigaas 20aad, heerka soogelidu waa baaxaa degayey. Waxaa jiray barnaamijyo si weyn ugu dhiirigelinayey Ingiriiska inay u guuraan Australia, kuwa badan ayaana sameeyey.

Mawjado dad ah oo aan Ingiriis ahayn ayaa soo bilawday wixii ka dambeeyey Dagaalkii 2aad, markii dad gaaraya malaayiin reer Yurub ahi ay ka tageen guryahoodii. Lambar badan oo reer Yurub ah ayaa yimid Australiya si ay nolol cusub u dhistaan.

Sanadihii dhowaa, barnaamijyadeena qaxootinimada iyo Soogalootiga wuxuu keenay Australia dad badan oo ka kala yimid adduunka dacaladiisa. Dad ayaa halka yimid si ay ula midoobaan qoysaskooda, inay ka sameeyaan nolol cusub wadanka, ama ka soo cararaan faqri, dagaal ama ciqaab.

Kala duwanaanshaha dadweynaha Australiya ayaa kordhay labadii qarni ee ugu dambeeyay. Bulshadan kaladuwan iyo barwaaqo waxay xoojineysaa isku xirnaanta Australiya iyo adduunka. In kastoo oo aan u dabaaldegno kala jaadjaadnimada Australia, waxaana kaloo doonaynaa in aan dhisno ummad isku xiran oo midaysan.

Luqada Australia waa luqada Ingiriiska. Waa qayb ka mid ah waxa wadankayaga lagu garto. Qof walba oo Australiya ku nool waxaa lagu dhiirigelinayaa inuu barto Ingiriis si uu door uga qaato bulshada Australiya. Kuhadalida Ingiriisiga waxay muhiim utahay sidii aad sida ugufiican aad ug noolaanlaheyd iyo ugu shaqeynsen laheyd Australiya.

Luqadaha kale ayaa iyagana la qiyamka, oo ay ku jiraan in ka badan 100 luqado kala duwan oo Aborijinis ah iyo Torres Strait Islander.

# Dawlad Goboleedyada Australia iyo Territoriska


Dawlada Dhexe ee Australia waxay ka kooban tahay dawlad goboleedyo iyo territoris isu tegay. Waxaa jira lix Dawlad Goboleed iyo laba dhulweyne oo territoris ah. Canberra ayaa ah caasumada Australia, gobol walba iyo territoris walbaana wuxuu leeyahay caasumadiisa.




| Gobalka | Magaalo madax |
|---|---|
| New South Wales (NSW) | Sydney |
| Victoria | Melbourne |
| Queensland (Qld) | Brisbane |
| Western Australia (WA) | Perth |
| South Australia (SA) | Adelaide |
| Tasmania (Tas.) | Hobart |
| **Territoriska** | **Magaalo madax** |
| Australian Capital Territory (ACT) | Canberra |
| Northern Territory (NT) | Darwin |

## Gobolada


**New South Wales** waxay ahayd degaankii ugu horreeyey oo Ingiriisku asaaseen. Sydney ayaa ah magaala madaxda New South Wales waana magaalada ugu weyn dalka. Beriijka loo yaqaan Harbour Bridge iyo Opera House ayaa ah astaanta qaranka.



**Fiktoriya** waa dawlad Goboleedka ugu yar dhul ahaan. Melbourne ayaa ah magaala madaxda Fiktooriya. Daaro badan oo ku yaalla Fiktooriya ayaa laga dhisay dhaqaalihii laga sameyey ku qamaamidii dahabka sanadihii 1850naadkii. Astaamaha Fiktooriya waxaa ka mid ah Gegida Diyaaradaha ee Melbourne, 12-ka Rasuul, iyo Dhismaha Bandhigga Boqortooyada.



**Queensland** waa gobalka labaad ee ugu dhulka weyn Magaala madaxda Queensland waa Brisbane. Waxaa ku yaalla Great Barrier Reef-ka ugu caansan adduunka kaas oo ku teedsan dhinaca xeebta bariga. Queensland waxay leedahay kayma roobeed, dhul xeebeed diiran iyo badanaa dhul qalalan oo gudaha xiga.



**Western Australiya** waa gobolka ugu weyn. Perth waa magaalo madax of Western Australia. Bariga gobolka badanaa waa lama degaan, halka koonfurta galbeed ay qani ku tahay dhul-beeraad iyo dhul canabku ka baxo. Gobolku waa hoyga mashaariic waaweyn oo macadano badan ah. Astaamaha Galbeedka Australiya waxaa ka mid ah Xeebta Ningaloo, Margaret River, iyo gobolka Kimberley.



**South Australia** waxay leedahay xeeb aan sinayn iyo qaybo badan oo caan ku ah canabka. Adelaide ayaa ah magaala madaxda, waxay leedahay tusaalayaal badan oo muujinaya dhismayaashii degaamynta gumeysiga. Astaamaha South Australiya waxaa ka mid ah Dooxada Barossa iyo Xadka Flinders.




**Tasmania** waa gobolka ugu yar, waxaana ka gooya dhulka intiisa kale Bass Strait. Hobart ayaa ah magaala madaxda Tasmania. Jasiirada badankeed waxay leedahay dhul aan weli la la haleyn. Astaamaha Tasmaaniyiinta waxaa ka mid ah Cradle Mountain, Port Arthur, iyo Bay ee Dabka



## The territories

**Xarunta Ganacsiga ee Australiya (Australian Capital Territory)** waxay ku taalaa inta u dhaxeysa Sydney iyo Melbourne. Waxay hoy u tahay magaalo-madaxda dalka, Canberra. Dhowr hay'adood oo qaran ayaa ah oo ku yaal Canberra, oo ay ku jiraan Aqalka Baarlamaanka iyo Maxkamadda Sare ee Australia.



**Territoriga Waqooyiga (Northern Territory)** wuxuu leeyahay deegaan kuleyl ah woqooyiga gobolka iyo saxa cas oo qalalan koonfurta. Darwin waa magaala madaxda. Astaamaha Northern Territory waxaa ka mid ah Uluru, Kata Tjuta iyo Kings Canyon.





# Caadooyinka

## Kusoo dhowow Wadanka iyo Aqoonsiga borotokoollada dalka

Ku soo dhawow Wadanku waa dhaqan soo jireen ah oo uu sameeyay wakiilka Aboriginal iyo Torres Strait Islander ee deegaanka, soo dhoweynta booqdayaasha dhulkooda dhaqameed. Tan ayaa dhaqan ahaan loo qabtay si loo hubiyo in booqdayaashu ay yeeshaan safar aamin ah oo ilaalin muddadii ay ku sugnaayeen dhulkaas.

Ku soo dhawow Wadanku wuxuu ku dhici karaa qaabab badan, oo ay ku jiraan heeso, qoob-ka-ciyaar, xaflado sigaar-cabid ama khudbado ku qoran luuqadda dhaqanka ama Ingiriisiga.

Ku soo dhawow Wadanku waa shaygii ugu horreeyay ee kulamada lagu furayo.

Aqoonsiga Wadanku waa fursad lagu aqoonsado in isu imaatinku uu ku yaalyo dhulka Aboriginal ama Torres Strait Islander; Xushmee Mas'uuliyiinta Dhaqanka, gaar ahaan Odayaashii hore iyo kuwa hadda; Ixtiraam u muuji dadka ka soo qeyb galaya ee Aboriginal iyo Torres Strait Islander.

Aqoonsiga Dalka inta badan waxaa loo keenaa qayb ka mid ah Soo dhaweynta iyo sida guriga loo isticimaalayo ee kulamada iyo munaasabadaha. Cid kastaa waxay gudbin kartaa Aqoonsiga Wadanka. Kulamada / munaasabadaha, tan waxaa guud ahaan lagu qaban doonaa Guddoomiyaha ama Masterka xafladaha

Dhaqamadan waxaa loo sameeyaa si lagu tuso ixtiraamka Aborijins iyo dadka jasiiradaha ka yimid.



# Maalmaha ugu muhiimsan reer Australia

## Maalinta Australia

Sanad walba 26da Janaayo, waxaanu u dabaaldegnaa maalinta Australia. Maalinta Australia waa fasax meel walba oo dalka ka mid ah. Waa sanad-guuradii kasoo wareegtay markii ay soo gaareen Diyaaraddii Koowaad ee ka timid Boqortooyada Ingiriiska sanadkii 1788-kii.

Maalinta Australiya, jaaliyadaha Australiya oo dhan waxay ka tarjumayaan taariikhdeena, iyo dadka ka qeyb qaatay guulaha aan wadaagno. Waa munaasabada ee ugu weyn Australia.

Maalinta Australiya waxay ku saabsan tahay ictiraafka iyo dabaaldegga tabaruca kasta oo Australiyaanku u sameeyo dadkeenna casriga ah ee frfrcoon: laga soo bilaabo dadyowga Asalka ah iyo Torres Strait Islander - oo halkan joogay qiyaastii 65,000 sano — kuwa halkan ku noolaa jiilal, iyo kuwa waxay ka yimaadeen dhammaan geeska adduunka si loogu waco waddankeena hooyo. Maalinta Australiya waxaa lagu xusaa munaasabado ka dhacaya guud ahaan Australiya, oo ay ku jiraan xafadaha muwaadinimada gaarka ah.

Maalinta ka horraysa maalinta Australiya, Raiisal Wasaaraha ayaa kaga dhawaaqa Abaalmarinta sanada Canberra. Munaasabadaha dhalashada oo tira badan ayaa la qabtaa maalinta Australia sanad walba.

## Socodka maalinta Anzac

Maalinta Anzac waxaa la xusaa 25ka Abriil sanad walba. Maalinta Anzac waxaa loogu magac daray Ciidanka Australia iyo New Zealand, kuwaas oo ka degay Gallipoli oo Turkiga ah intii lagu jiray dagaalkii 1aad ee Adduunka 25kii Abriil 1915.

Maalinta Anzac waa maalin aad u weyn oo aan ku xasuusano naf huridii dhamaan reer Australia kuwaas oo dagaalka ka qaybgalay una dhintay, hawlihii dagaalka iyo nabad ilaalinta. Waxaan sidoo kale xushmeyneynaa geesinimada iyo dadaalka dhamaan adeegayaasha iyo haweenka waxaanan xusuusanaa macnaha badan ee dagaal.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan maalinta Australia, maalinta Anzac iyo maalmaha kale ee qaranka oo muhiimka ah waxaa laga heli karaa qaybta 5aad, Australiyada maanta.

# Calanka Australiya

Calanka Qaranka ee Australiya Calamaan kale ayaa si rasmi ah loo aqoonsan yahay waxaana laga taa Aborijinal Australia iyo Calanka Torres Strait Islander.

Gobol kasta iyo Teritori waliba waxay leeyihiin calan u gaar ah, oo lagu daawan karo bogga 11.

## Calanka Qaranka ee Australia

Calanka Qaranka ee Australia waa buluug, cadaan, iyo guddud. Wuxuu leeyahay saddex qaybood oo muhiima:

- 'Union Jack', oo ah calanka Boqortooyada Ingiriiska ayaa ku yaala dhinaca bidix ee dusha. Calanku wuxuu matalaa taariikhdeena degitaanka Ingiriiska.
- Xiddigta Dawlada Dhexe waxay ku hoos taal Union Jack. Xiddigtani waxay leedahay todoba dhibcood, hal waxay u taagan tahay lixda Dawlad Goboleed tan kale waxay u taagan tahay territoriska.
- Southern Cross-ka ku taal midigta, waa kooxo xiddiga ah oo aan ku aragno dhinaca koonfureed oo cirka.



## Calanka Aborijiniska

Calanka Australian Aborijinis waa madow, guduud iyo jaallo.

- Qaybta kore waa madow waxay u taagan tahay dadka Australian Aborijiniska ah.
- Qaybta hoose waa casaan waxay u taagan tahay dhulka iyo xidhiidhka ay la leeyihiin dalka caqiido ahaan.
- Qoolaabta huruuda waxay u taagan tahay cadceeda.



## Calanka Torres Strait Islander

Calanka Torres Strait Islander waa akhdar, buluug, madow iyo cadaan.

- Akhdarku wuxuu u taagan yahay dalka.
- Buluugu wuxuu u taagan yahay badda.
- Madowguna wuxuu u taagan yahay dadka Torres Strait Islander.
- Dharka cad oo madaxa ay ku xidhaan kuwa cayaaraa waxay astaan u tahay dhamaan Torres Strait Islanders.
- Qodobada xidigaha cadi waxay u taagan yihiin jasiiradaha dhowrka ah ee Torres Strait, iyo midbka cad waxaa uu u taagan yahey nabadgelyo.



# Sumada Australiya

## Coat of Arms Dawlada Dhexe

Commonwealth Coat of Arms waa calaamada rasmiga ah oo u taagan Dawlada Dhexe. Waxay matashaa midnimada qaranka. Waxay muujisaa awooda iyo hantida Dawlada Dhexe.

- Gaashaanka dhexe wuxuu matalaa lixda dawlad Goboleed iyo isku darsanka.
- Kangaroo iyo gorayo ayaa taageera gaashaanka dhinac walba. kangaroo waa xayawaanada Australiyaanka asaliga ah.
- Xiddigta dawlada dhexe ee dahabiga ah ayaa ku fadhiisata gaashanka korkiisa.
- Xaga dembe waxaa ka muuqda wattle dahabi ah, ubaxa qaranka Australia.




## Ubaxa Qaranka Australia

Ubaxa Qaranka Australia waa wattle dahabi ah. Geedkaani yari wuxuu ka baxaa badanaa koonfurta bari oo Australia. wuxuu leeyahay caleemo cagaara oo dhalaalaya iyo ubaxyo badan oo jaalla dahabi ah. Gobol walbaa iyo territori walbaa wuxuu leeyahay ubax isaga u gaara.



## Midabada qaranka Australia

Midabadeeda qaranka ee Australiya waa akhdar iyo dahabi, midabada wattle waa dahabi. Gaar ahaanshaha kooxaha cayaaraha ee qaranka badanaa waa dahabi.





## Dhagaxa-qiimiga ah qaranka Australia

Opalka ayaa ah dhagaxa-qiimiga ah ee qaranka Australia. Sheekooyinka Aborijiniska, qaansa roobaad ayaa taabatay waxayna abuurtay opalka.



# Heesta qaranka Australia

Advance Australia waa heesta qaranka Australia. Waxaa lagu heesaa munaasabadaha muhiimka u ah qaranka, oo ay ku jiraan xaflada Dhalashada Australiya iyo munaasabadaha ciyaaraha ee waaweyn.

## Advance Australia Fair

*Australians all let us rejoice,*
*For we are one and free;*
*We've golden soil and wealth for toil;*
*Our home is girt by sea;*
*Our land abounds in nature's gifts*
*Of beauty rich and rare;*
*In history's page, let every stage*
*Advance Australia Fair.*
*In joyful strains then let us sing,*
*Advance Australia Fair.*

*Beneath our radiant Southern Cross*
*We'll toil with hearts and hands;*
*To make this Commonwealth of ours*
*Renowned of all the lands;*
*For those who've come across the seas*
*We've boundless plains to share;*
*With courage let us all combine*
*To Advance Australia Fair.*
*In joyful strains then let us sing,*
*Advance Australia Fair.*



# QAYBTA 2AAD

## Aaminsanaanta Habka Dimoqraadiga ah, xuquuqda iyo xoriyada

# Aaminsanaanta Habka Dimoqraadiga ah, xuquuqda iyo xoriyada

Xaflada dhalashada, waxad ballan qaadaysaa in aad la wadaagayso aaminsanaanta Australia dimoqraadiyada iyo inaad ixtiraamayso xuquuqda iyo xoriyada dadka Australia. Sidaas darteed waa muhiim inaad fahamtid aaminsanaanta dimoqraadiyada, iyo xuquuqda iyo xoriyada ay dhamaan dadka Austrliyaanka ahi ay ixtiraamaan.

Qaybtan buug-yarahan ah waxaa ku taxan aaminsanaanta, xuquuqaha iyo xorriyadda. Macluumaad intaas ka badan eeg Qaybta 4 aad-Qiyamka Australiya.

## Aaminsanaantayada dimoqraadiyada

### Dimoqraadiyada baarlamaaniga ah

Australia nadaamkeeda xukuumadeed waa hab baarlamaan oo dimoqraadi ah. Awooda dawlada waxay ka timaadaa shicibka Australiyaanka ah sababtoo Australiyaanka ayaa si joogto ah cod u siiya cida ay dooranayaan inay u matasho baarlamaanka. Baarlamaan dimoqraadi ah, wakiilada baarlamaanka waxaa waajib ku ah inay sameeyaan waxa dadku rabo, iyada oo doorasho loo marayo, go'aanka ay sameeyaan.

### Habka qaanuuniga ah

Dhamaan dadka reer Australiya waa siman yihiin sharciga hortiisa. Habka qaanuuniga ah macnaheedu waa qof, koox ama xukun diimeed majiro sharciga ka sarraysa. Qofkasta, oo ku jiraan dadka xilalka awoodeed haya bulshada dhexdeeda waa inay ilaaliyaan sharciga Australiya. Taas waxaa ku jira xukuumada, hogaamiyayaasha diimeed iyo bulsho, iyo weliba dadka ku jira ganacsiga iyo booliiska.

### Nabad ku wada noolaanshaha

Waxaan ku faraxsanahay in aan ku nool nahay Australiya oo ah meel leh kala damayn. Waxaanu aaminsanahay in isbedel ku yimaado wada hadal, isqancin nabad ah iyo hab dimoqraadi ah. Waxaan diidanahay rabshadu inay noqoto tan lagu bedelo qofka maskaxdiisa ama sharciga.

### Ixtiraam dhamaan dadka oo dhan iyada oo aan ku xirnayn asalkiisa

Nidaamka dimoqraadiga ah ee Australiya wuxuu ku saleysan yahay mabda'a ah in shaqsi kasta, iyadoo aan loo eegin asalkiisa, uu leeyahay xuquuq iyo sinnaan sharciga Australiya. Waan qiimaynaa xoriyadaas waxaana filaynaa in dadka Australiyaanka ah dhamantood qof walba u ixtiraamaan si sharaf iyo qadarin leh qofka kale iyada oo aan ku xirnayn jinsiyadiisa, da'diisa, iintiisa, hidahiisa, dhaqankiisa, siyaasadiisa, dhaqaalihiisa iyo diintiisa.



# Xoriyadeena

## Xoriyada hadalka iyo xoriyada muujinta dareenkaaga

Xoriyada hadalku waxay u ogolaataa dadka inay yiraahdaan ama qoraan waxay aaminsan yihiin kalana hadlaan aragtidooda kuwa kale. Waxaan dhaleecayn karaa xukuumada, si nabad ah mudaaharaadna ugu samayn karaa go'aanada una ololayn karaa bedelida sharciga.

Xoriyada muujinta waxay u ogolaataa dadka inay ku muujiyaan aragtidooda farshaxan, filim, muyuusig, iyo suugaan. Waxaan xor u nahay inay kula kulano kuwa kale goobaha dadweynaha si aan uga wada hadalo siyaasad ama arrima ijtimaci ah.

Waqtiyada oo dhan, xitaa inta lagu gudajiro xorriyadda hadalka iyo xorriyadda mujinta, sharciga Australiya waa in la addeeco. Waxaa waajiba in aan ixtiraamno dadka kale xoriyadooda hadalka iyo xoriyadooda dareen muujinta.

## Xoriyada jimciyada

Xoriyadda isu imaatinka ayaa xaq u leh sameynta iyo ku biirista ururada si ay u gaaraan yoolalka guud. Tusaaley ahaan, Australiyaanku waxay xor u yihiin inay ka tirsanadaan urur kasta oo sharci ah, sida mid siyaasadeed, shaqaale, diimeed, dhaqan ama kooxo bulsho. Waxay dadku kaloo go'aan ka gaari karaan in aanay ka mid noqon.

Australiyaanku waxay ku darsami karaan kuwa kale si ay mudaaharaad uga sameeyaan go'aan dawladu gaartay ama urur. Waqtiyada oo dhan, si kastaba ha noqotee, sharciyada Australiya waa in la addeeco. Taas macneheedu waxa weeye in dadku u sameeyaan si nabad ah waana in aanay waxba yeelin cidna ama hanti cidi leedahay.

## Xoriyada diimta

Australiya waxay leedahay hiddo ka soo jeeda Yuhuudda-Masiixiga, in badan oo Australiyaan ah waxay isku tilmaamaan inay yihiin Masiixiyiin, laakiin waxaa jira dad Australiya jooga oo ka socda dhammaan diimaha waaweyn. Australiya waxay leedahay ciidaha maalmaha Kirishtaanka sida Jimcaha Wanaagsan, Axada Easter iyo Maalinta Kirismaska.

Xukuumadu waxay ula dhaqantaa dadka oo dhan si siman, diin iyo caqiida kasta oo ay haystaan. Dawlada Australiya waa mid cilmaaniya, taas oo macnaheedu yahay inay u shaqeyso si ka gooni ah kaniisadaha ama hay'adaha kale ee diinta. Australiya ma laha diin qaran oo rasmi ah. Dadka Australiya waxay xor u yihiin inay raacaan diin kasta oo ay doortaan. Waxaa laga yabaa in aaney dooran in ay diinba raacaan.

Waqtiyada oo dhan, xitaa inta lagu gudajiro ku dhaqanka diinta, sharciga Australiya waa in la addeeco. Halka uu khilaaf ka dhexeeyo sharciga Australia iyo ku dhaqanka diinta, sharciga Australiya ayaa adkaada

# Waxa isku-keen xira

Waxaa jira dhowr sharci Australiya gudaheeda kuwaas oo xaqiijiya in qof aan loola dhaqmin si ka duwan ku kale sabab la xirdhiidha sinjiga, iinta ama da'da.

## Sinaanta jinsiga

Raga iyo dumarka waa isku xaq Australia. Waxay ka soo horjeeda sharciga in qof la takooro sababa la xiriira jinjigiisa.

## U-sinaanta fursadaha iyo 'ku socod cadaalad 'fair go'

Australiyaanku waxay qiimeeyaan fursada loo siman yahay ee bulshada dhexdeeda; waxa badanaa loo yaqaan 'cadaalad go, fari go'. Tan macneheedu waxa weeye waxa qof heli karo waa inay ka timaadaa da'daalkiisa iyo kartidiisa, halkii ay ka ahaan lahayd dhaqaalihiisa ama asalkiisa. Tani waa in la hubiyo inaaney jirin kala soocitaan rasmi ah oo bulshada Australiya dhexdeeda ah.

# Masuuliyaadka iyo mudnaanta dhalashada Australiya

Markaad noqoto muwaadin Australiyaan ah, waxaa ku saaran masuuliyad cusub.

## Masuuliyaadka – waxaad siin doonto Australiya

Muwaadin Australiyaana ahaan waxaa waajib kugu ah:

- adeecida shuruucda Australiya.
- ka codbixinta doorashada federaalka iyo dawlad Goboleedka ama territoriska, iyo cod ka bixinta xaallad afti bixinta
- difaacida Australiya haddii baahiyi timaado
- inaad qabato shaqada xeerbeegta hadii laguugu yeero

## Mudnaanta—maxey Australiya ku siindoontaa

Muwaadin Australiyaana ahaan waxaa waajib kugu ah:

- ka codbixinta doorashada federaalka iyo dawlad Goboleedka ama territoriska, iyo cod ka bixinta xaallad afti bixinta
- u-qor carruurta ku dhalatay dibada inay yihiin muwaadiniin Australiyaana
- inaad shaqo ka dalbato Adeega Dadweynaha Australia ama Ciidamada Xooga Dalka Australiainaad baarlamaanka isu soo sharaxdo
- raadinta in baarlamaanka laguu doorto
- dalbashada baasaboorka Australiya iyo xor ugu soo noqoshada Australiya
- ka hel caawimo sarkaal Australiyan ah markaad dibada joogto




# Masuuliyaadka – waxaad siin doonto Australia

## Odeecida shuruucda Australiya.

Wakiiladayada dawlada ku jira ayaa sameeya sharciga si loo helo bulsho amaana, xor ah oo nadaamsan difaacdana xuquuqdeena. Dhamaan muwaadiniinta Australiyaanka ah iyo dadka kale ee Australiya joogaa waa inay adeecaan sharciyada Australiya.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan sharciya muhiima waxaa laga heli karaa qaybta 3aad, Xukuumada iyo Sharciga Australia.

## Ka codbixinta doorashada federaalka iyo dawlad Goboleedka ama territoriska, iyo cod ka bixinta xaallad afti bixinta

Muwaadin Australian ah oo jira 18 sano ama ka weyn waa inuu ka qaybgalo doorashada.

Waa mas'uuliyad saaran muwaadiniinta Australiyaanka ah ee da'doodu tahay 18 sanadood ama ka weyn inay u codeeyaan doorashooyinka federaalka iyo dowlad-goboleedka ama taritoriga, iyo aftida, taas oo ah cod lagu beddelo dastuurka Australiya. Markaan sidaas samaynayno waxaan dhamaanteen leenahay codka ah sida wadanka loo xukumo waxaana door ka qaadanaa mustqabilka Australia.

Codbixintu waa khasab dawlada dhexe ee Australiya iyo dawlad goboleedka iyo doorashada territoriga. Codbixinta doorashada dawlada hoose maaha khasab dawlad goboleedyada qaarkood.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan distuurka waxaa laga heli karaa qaybta 3aad, 3aad, Xukuumada iyo Sharciga Australia.

## Difaacida Australiya haddii baahiyi timaado

In kasta oo adeegga Ciidamada Difaaca Australia uu yahay mid iskaa ah, mas'uuliyada saaran muwaadiniinta Australiyaanka ahi waa inay difaacdo Australiya haddii loo baahdo. Waa muhiim in dhamaan muwaadiniinta reer Australia ay ka qayb qaataan difaaca ummada iyo habkeeda nololeed. Dhalashada Australiya:

## Inaad qabato shaqada xeerbeegta hadii laguugu yeero

Adeega xeerbeegta waa masuuliyada muwaadinka. Xeerbeegto waa masuuliyada muwaadinka Australiyaanka ah ee jira 18 sanadood ama ka weyn. Xeerbeegto waa koox Australiyaan ah rag iyo dumar kuwaas oo dhegaysta cadaynta hor taala maxkamada go'aana ka gaara dembiile ama dembi laawe.

Qof kasta oo ku jira liiska codbixinta oo Australiyaan ah waxaa loogu yeeri karaa inuu xeerbeeg noqdo. Adeega xeerbeegtu wuxuu caawima in la xaqiijiyo nadaamka maxkamadu yahay mid furan oo xaq ah.

## Mudnaanta

### Ka dalbo shaqo Adeega Dadweynaha Australia iyo Ciidanka Xooga Australia

Haddii aad tahay muwaadin Australian ah, waxaad dalban kartaa inaad ku biirto adeega dadweynaha Australiya waxaadna u shaqayn kartaa xukuumada Australia, tusaale ahaan, Adeegyada Australiya, ama Xafiiska Cashuuraha ee Australia (ATO).

Muwaadiniinta Australiyaanku waxay kaloo xaq u leeyihiin inay dalbadaan shaqada xooga dalka Australia (Ciidanka lugta, Badda iyo Cirka).

### Raadinta in baarlamaanka laguu doorto

Muwaadiniinta Australiyaanka ah oo jira 18 sanadood ama ka weyn ayaa raadsan kara doorashada baarlamaanka, dawlad goboleedka ama heerka territoriga. Waxay noqon kartaa sharaf iyo masuuliyad weyn in laga shaqeeyo baarlamaanka Australiya.

### Dalbashada baasaboorka Australia iyo xor ugu soo noqoshada Australia

Markaad noqoto Australiyaan, waxaad xaq u leedahay inaad si xor ugu noolaato Australia. Waxaad leedahay xaqa aad ku dalbato baasaboorka Australiya. Hadii aad dalka dibadiisa u safartid muwaadin Australia ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad ku soo noqotid Australiya adiga oon u baahneyn fiise.

### Ka hel caawimo sarkaal Australiyan ah markaad dibada joogto

Wadama badan, Australia waxay ku leedahay safaarad, Guddi Sarre (High Commission) ama qunsuliyad. Markaad dibada joogtid, waxaad weydiisan kartaa caawimo sarkaal markaad u baahan tahay. Kuwaas waxaa ku jira xaalladaha degdegta ah sida kacdoonka shicibka ama qalalaase dabiici ah.

Saraakiishu waxay kaloo bixin karaan xaalladaha degdegta ah baasaboor waxayna siin karaan talo iyo kaalmo haddii uu yimaado shil, xanuun aad u daran ama dhimasho.

Markaad wadan kaleeto joogto, waxaa waajib kugu ah inaad ilaaliso sharciga wadankaas.

### U-qor carruurta ku dhalatay dibada inay yihiin muwaadiniin Australiyaana

Muwaadiniinta Australiyaanka ah way dalban karaan ilmahooda ku dhashay dibada si ay u noqdaan dhalasho Australiya.

# Qayb ka qaadashada bulshada Australia

Australiya waxay ku dhiirigelisaa dhamaan Australiyaanka inay ka qaybgalaan mujtamaca. Muwaadiniinta firfircoon waxay qaadanayaan mas'uuliyadda iyo mudnaanta qaabeynta mustaqbalka Australiya. Tusaale ahaan, waxaad ku biirikartaa jaarkaaga iyo ururada bulshada ee degaankaaga, si aad uu tabarucdid hawlaha bulshada, in aad ku biirtid ururada funka iyo dhaqanka, iyo in aad ka qaybgashid nolosha siyaasadded.

Bixinta cashuurtu waa qaab kale oo muhiim ah oo aad toos ugu tabarucdo bulshada Australiya sharci ahaanna loo baahan yahay. Canshuuraha waxaa lagu bixiyaa lacagta aad shaqaysato, ha ahaato mid shaqada, ganacsi ama maalgashi, waxaanaaaruuriya ATO. Waxa kale oo jira cashuur alaabooyin iyo adeegyo badan. Xafiiska cashuurta (ATO) wuxuu u shaqeeya xaqiijinta in dhamaan muwaadiniintu la socdaan xuquuqda cashuurtooda iyo waajibaadka in la bixiyo cashuurta saxda ah.

Qaar badan oo faa'iidooyinka dhalashada oo Australiyaanku ay ku raaxaystaan waxaa suurtagal ka dhigta cashuurta. Cashuurta waxaa lagu bixiyaa adeegyada ay ka midka yihiin caafimaadka, waxbrashada, difaaca, wadooyinka iyo khuduuda tareenada, iyo damaanada bulshada.

In aad shaqeysid iyo bixinta cashuurta, waxaad caawimi kartaa dawlada si aad u siiso adeegyadaan muhiimka ah bulshada Australiya. Dawlad goboleeyada iyo dawladaha ka jira territoriska iyo golayaasha degmada ayaa iyaguna ururiya cashuur si loogu bixiyo adeegyo. adeegyadaani waxay ka caawimaan Australia inay noqoto meel nabad ah oo barwaaqo ah maanta.



# QAYBTA SEDDEXAAD

# Dawladda iyo sharciga Australiya

# Dawladda iyo sharciga Australiya

Munaasabada dhalashada, waxaad ku dhaaranaysaa ilaalinta iyo adeecida shuruucda Australia. Australia nadaamkeeda xukuumadeed waa hab baarlamaan oo dimoqraadi ah. Waa muhiim inaad fahamto nadaamka Australia oo dawlada, sida sharciga loo sameeyo baarlamaankeena dimoqraadiga ah iyo sida sharciyadaan loo maareeyo. Sidoo kale waa muhiim inaad fahamtid sida, muwaadin ahaan, aad cod ugu yeelanayso maamulida wadanka.

## Sidoo codkayga u dhiibanayaa?

### Codeynta

Sida lagu soo koobey Qaybta 2, Australiya gudaheeda, dadka jira 18 sanadood ama ka weyn waxaa waajib ku ah inay ku qoran yihiin liiska codbixinta doorashada dawlada dhexe.

Dimoqraadiyada baarlamaaniga Australiya, muwaadiniintu waxay leeyihiin ra'yi ah oo ku saabsan sida Australiya loogu xukumo codbixinta qof matalaya baarlamaanka Haddii aadan si sax isu qorin, cod kama bixin karto doorashada.

Codbixintu waa khasab doorashooyinka Australiya, ama haddii ifti laga qaado isbedelka dastuurka

Guddiga Doorashada ee Australiya (AEC) waa hay'ad Dawlada Dhexe ka masuul ah qabashada doorashooyinka federaalka iyo aftida, iyo dayactirka liiska doorashada Dawlada Dhexe. AEC waa ka madax banaan tahay dawlada. Xisbiyada siyaasadeed ama dadka dawlada ku jiraa ma jahayn karaan go’aanada AEC.

Codbixinta waxaa lagu bixiyaa hab qarsoodi ah, sidaas darteed waa u fasaxan tahay inaad codka siiso musharaxaad rabto. Qofna looma oggola inuu ogaado cidda aad u codeysay, ilaa aad dooratid inaad u sheegto mooyaane. Haddii aadan cod ka bixin doorashada ama aadan haysan sabab aadan codka u bixin, waa inaad bixisaa ganaax. Khasab ku codbixintu waa hab lagu xaqiijiyo in dadka aan dooranay ay yihiin kuwa dadka iintiisa badani rabaan.

### U soo badhigista arrimaha wakiilladaada

Muwaadiniinta Australiyaanka ah waxay la xihiidhi karaan wakiilkooda la soo xulay si ay kor ugu qaadaan dareenkooda ku saabsan siyaasada dawlada. Sidaas, dhamaan Australiyaanka ayaa fikrad ka dhiiban kara shuruucda iyo siyaasada xukuumada. Haddii muwaadinku u sheego wakiilka la doortay inuu u baahan yahay sharci in wax laga beddelo, wakiilka la soo doortay waa inuu tixgeliyaa wixii la soo jeediyey.

# Sidee u asaasnay nadaamkayaga xukuumadeed?

## Isu-darsanka

Isu-tagKa hor 1901, Australiya waxay ka koobnayd lix deegaan oo kala duwan oo iyagu is xakuma oo Ingiriisku leeyahay.

Xuduuda gudaheeda, degaan walbaa wuxuu lahaa distuurkeeda iyo sharcigeeda la xiriira difaaca, socdaalka, boostada, ganacsiga iyo gaadiidka. Si kastaba ha noqotee, tani waxay abuurtay dhibaatooyin u dhexeeya gumaysiga. Tusaale ahaan, Ganacsiga iyo gaadiidka u dhexeeyey degaanada wuxuu ahaa mid qaali ah oo gaabinaya, iyo fullinta sharciga xuduudaha wuu adkaa. Degaanada kala duwani waxay lahaayeen nadaam difaac oo daciifa.

Sidaa awadeed, dadku waxay doonayeen inay midoobaan degaanadu si loo sameeyo hal wadan. Tan ugu muhiimsan, aqoonsiga qaran ee Australiya wuxuu bilaabey inuu sameysto. Kooxaha ciyaaruhu waxay wadajir uga matalayeen Australiya caalami ahaan xagga dhaqanka waxayna samaynayeen heeso, gabayo, sheekooyin iyo farashaxan la jecel yahay.

Midaynta umada waxay ahayd wax adag, laakiin in muddo ah, aragtida qaranka Australia wuxuu noqday mid xaqiiq ah. 1dii Janaayo 1901, deegaanada waa la mideeyey waxayna noqotay isu-taga dawlad goboleedyo loogu yeero Dawlada Barwaaqa-sooranka Australia.


## Distuurka Australiya

*Distuurka Australiya Xeerka Distuurka Barwaaqasooranka Australia ee 1900* waa dukumintiga sharciga ah kaas oo dhigaya shuruucda asaasiga ah ee dawlada Australiya. Australiya distuurkeeda waxaa horay asal ahaan la ogolaaday isaga oo qayb ka ah Xeerka Ingiriiska 1900kii. Janaayo 1901, markuu distuurku dhaqangalay, deegaanada Australia waxay noqdeen kuwa madaxbanaan oo hal mid ah, Barwaaqasooranka Australiya.

Distuurka Australiya wuxuu asaasay baarlamaanka barwaaqasooranka, oo lagu abuuray Aqalka Hoose iyo kan mudanayaasha. Distuurku wuxuu kaloo asaasay Maxkamada sarre oo Australia, taas oo leh awooda lagu dabakho laguna tarjumo qaanuunka Australia.

Dadka Australiyaanka ah way baddali karaan dastuurka Australiya iyagoo cod ka dhiibanaya afti, sida aftidii 1967 halkaas oo in kabadan boqolkiiba 90 dadka Australiyaanka ahi ay u codeeyeen 'Haa' si loogu oggolaado dadka Aborijiniska ah in lagu tiriyo Tirakoobka.

Cod-dhiibashada, waa inay jiraan laban-laab dadka intiisa badan oo doonaya in la bedelo distuurka. Taas macneheedu waxa weeye codbixiyaaysha intooda badan oo aqlabiyada codbixiyayaysha wadanka oo dhan waa inay u codeeyaan isbedelka.




Distuurka Australiya

# Sidee lagu kantaroollaa awooda xukuumada?

Distuurka Australiyaa ayaa qaybiya awooda dawlada inta u dhexeysa sharci dejinta (baarlamaanka), fulinta executive (tusaale ahaan Raiisel wasaaraha iyo golaha wasiirada) iyo awoodaha garsoorka (garsoorayaasha), si looga joojiyo hal qof, ama hal koox, in ay qabtaan awooda oo dhan.

## Awooda Sharci samaynta

Awoodda sharci-dejintu waa awoodda sharci sameynta. Baarlamaanku wuxuu leeyahay awooda lagu sameeyo laguna bedelo sharciga. Baarlamaanku wuxuu ka kooban yahay wakiilada ay soo doorteen dadka Australiyaanka ahi.

## Awooda fulintu

Awooda fulisa sharciga. Fulinta waxaa ka mid ah Ra'iisul Wasaaraha, wasiiro ka tirsan dowladda Australia iyo Wakiilka Boqorada (Governer General). Wasiirada ayaa mas'uul ka ah waaxyaha dowlada.

## Awooda cadaalada

Xaakimadu waxay leeyihiin awooda lagu tarjumo laguna dabakho sharciga. Maxkamadaha iyo xaakimadu waa ka madaxbanaan yihiin baarlamaanka iyo xukuumada.


Awoodahaani waxay ku qoran yihiin distuurka Australia.

# Waa kuma Madaxa Dawladu?

Madaxa Dawladda Australia waa Boqorka Australia, Boqor Charles III.

Boqorka Australia ayaa u magacaabaya Guddoomiyaha Guud (Governor-General) inuu noqdo wakiilkiisa Australia, isagoo talo ka helay Ra'iisul Wasaaraha Australia. Wakiilku wuxuu wax
u qabtaa si ka madaxbanaan dhamaan qaybaha siyaasadeed. Boqorku shaqo maalmeed kuma laha dawladda.

Mid kasta oo ka mid ah gobollada waxa uu leeyahay guddoomiye matalaya boqorka door la mid ah Guddoomiyaha Guud.



Boqorka Charles III

## Boqortooyo distuuri ah

Australia waa boqortooyo dastuuri ah, taas oo macnaheedu tahay in Boqorku yahay Madaxa Dawladda Australia, laakiin waa inuu u dhaqmaa si waafaqsan dastuurka. Maadaama uusan Boqorku ku noolayn Australia, awoodihiisa waxaa loo wakiishay Guddoomiyaha Guud (Governor-General ) ee Australia.

Nidaamka Australiyaanka ee dimuqraadiyada baarlamaanka wuxuu ka turjumayaa caadooyinka Ingiriiska iyo Woqooyiga Ameerika oo si isku mid ah loogu wada dhaqmay hab aan Australia u wanaagsanayn Nadaamka Australia, hogaamiyaha xukuumadu waa Raiisal Wasaaraha.

## Doorka Wakiilka Guud ee Boqorada

Guddoomiyaha Guud kama tirsana dawladda waana inuu ahaadaa mid dhexdhexaad ah.

Masuuliyada Wakiilka Guud ee Boqorada waxaa kamid ah:

- wuxuu saxiixaa biilasha ay ansixiyaan baarlamaanka Australia (hawshaas waxaa loogu yeeraa Royal Assent)
- samaynta waajibaadka munaasabadaha
- wuxuu magacaabaa dawlada Australiya iyo wasiiradeeda, xaakimada federaalka iyo saraakiil kale
- bilaabaya geedi socodka doorashada federaalka
- ahaanshadaTaliyaha Guud ee Ciidamada Difaaca Australiya.

Wakiilka guud wuxuu kaloo leeyahay awooda khaasa 'awoodaha xafdan' taas oo loo isticmaali karo keliya xaallada mucayina.

# Yaa ka mid ah hogaamiyayaasha Australia?

### Madaxa Dawlada
Boqorka Australia

### Wakiilka Guud ee Boqortooyada
Wakiilka Madaxa Dawlada Australia

### Wakiilka Boqorada
Wakiilka Madaxa Dawlad Goboleed walba oo Australiya ku yaal

### Hogaamiyaha Xukuumada Australia
Madaxa Dawlada Australia

### Madaxa Dawlad Goboleedka
Madaxa Dawlad Goboleedka

### Hogaamiyaha Xukuumada Australiya
Madaxa xukuumada territoriga

### Wasiirka Xukuumada
Xubin baarlamaan oo ay doorteen dadku si uu masuul uga noqdo qayb ka mid ah xukuumaad

### Xubin baarlamaan
Wakiilka la soo doortay ee dadka ka tirsan Baarlamaanka Australiya ama baarlamaanka gobolka

### Mudane
Wakiil loo soo doortay dawlad goboleed ama territori baarlamaanka Australia

### Duqa ama Madaxa tuulada
Madaxa golaha degmada

### Xubin gole
Xubin loo soo doortay golaha degmada

# Sidee lagu xakumaa Australia?

## Xukuumada Australiya

Xukuumada Australia waxaa kaloo loogu yeeraa Xukuumada Federaalka ama Xukuumada Barwaaqasooranka. Dawladu waxey ka kooban tahey xubnaha Baarlamaanka Australiya, kas oo leh laba aqal:

- Aqalka Wakiilada
- Mudanaha.

Markaad codka bixiso doorashada federaalka, waxaad caadatan doorataa wakiilada aqal walba.

## Aqalka Wakiilada

Golaha Wakiiladu wuxuu ka mid yahay Golayaasha baarlamaanka Australiya. Aqalka wakiilada waxaa badanaa loogu yeeraa Aqalka Hoose ama Aqalka Dadka.

Australia waxaa loo kala qaybiyaa goobaha doorashada federaalka. Xubnaha baarlamaanka (xildhibaano) waxay matalaan dadka doorashadooda.

Tirada xubnaha baarlamaanka ee dawlad goboleed iyo territori walba waxay ku salaysan yihiin inta dadkeedu le'eg yahay. Guud ahaan, waxaa jira in kabaddan 150 xubnood oo loo doortey Aqalka Wakiilada.

Xubnaha baarlamaanka iyo guurtida waxay ka doodaan soo jeedinta shuruucda cusub ee baarlamaanka Australiya. Shaqada muhiimka ah oo Aqalka Wakiilada waa inay tixgeliyaan, ka doodaan una codeeyaan sharciyo cusub ama isbedelka shuruucda.



Aqalka Wakiilada

## Mudanaha

Guurtidu waa Aqalka kale ee baarlamaanka Australiya ah. Mudanayaasha waxaa mararka qaarkood loogu yeeraa Aqalka Sare, Aqalka Dib-u-eegida ama Aqalka Dawlada. Cod-bixiyeyaasha gobol kasta waxay sidoo kale dooranayaan senatarro matalaya aqalka senate-ka. Dawlad Goboleedada tira isle'eg oo mudanayaala ayaa ka jooga, iyada oo aan ku xirnayn tirada ku nool. Waxaa jira guud ahaan 76 mudane Gobol kastaa wuxuu doortaa 12 guurti, iyo Australian Capital Territory iyo Waqooyiga Territory mid walba wuxuu doortaa laba guurti.

Wakiiladu waxay kaloo qadariyaan, ka doodaan kana codbixiyaan sharciga cusub ama wax ka bedelida shuruucda.



Mudanaha

## Dawlad goboleedka iyo territoriska

Waxaa jira dawlad goboleed iyo laba territori Australia gudaheeda. Gobol walbaa wuxuu leeyahay distuur u gaar ah iyo baarlamaankiisa. Xukuumadaha dawlad goboleedka iyo territorisku waxay ku yaalliin magaala madaxyada. Hogaamiyaha xukuumada dawlad goboleedku waa madaxa iyo hogaamiyaha xukuumada territoriga iyo Wasiirka ugu Sarreeya.

Dawladaha gobolku waxay u shaqeeyaan si la mid ah tan dawladda Australia. Gobol kasta, Gudomiyehu wuxuu matalaa Boqorka Australia. Territoriga waqooyiga, maamule ayaa waxaa u magacaaba wakiilka Guud ee Boqorka. Doorka iyo masuuliyaadka maamulaha waxay la mid yihiin kuwa wakiilka dawlad goboleedka.

Gobolku wuxuu leeyahay xuquuqo uu aqoonsan yahay dastuurku halka teritorigu aanu lahayn. Gobolku wuxuu awood u leeyahay inuu ku dhaafo sharciyada xuquuqdooda gaarka ah halka sharciyada teritori iskood u taliya ay u beddeli karto ama ka burin karto Dowladda Australiya waqti kasta.

Dawlad goboleedyad iyo taratoriyada, muwaadiniinta Australiya waxay cod u bixiyaan inay doortaan wakiilka halka ay joogaan. Wakiiladani waxay noqdaan xubinta dawlad goboleedka ama baarlamaanka territoriga.

## Xukuumada dawladaha hoose

Dawlad goboleedyada iyo Northen territoriga waxaa loo kala qaybiyaa meelaha xukuumada dawlada hoose kuwaas loogu yeedhi karo magaalooyin, dagmooyin, tulooyin iyo xaafado. Mid walba oo iyaga ka mid ahi waxay leedahay goleheeda. Golayaashu waxay masuul ka yihiin qorshaynta iyo bixinta adeegyada dawladaha hoose. Muwaadiniinta dawladaha hoose waxay codka siiyaan golayaasha degmada.

# Maxay saddexdaan heer oo xukuumadeed sameeyaan?

Farqa ugu weyn ee u dhexeeya saddexda heerar ee dowladda ayaa ah, in kasta oo mas'uuliyadaha qaar ay isku soo duubnaan karaan, haddana heerar kasta oo dowladeed ayaa bixiya adeegyo kala duwan.

### Dawlada Australia waxay masuul ka tahay:

- cashuurta
- maamulka dhaqaalaha qaranka
- socdaalka iyo dhalashada
- caawimada shaqada
- adeegyada boostada iyo shabakada isgaarsiinta
- damaanada bulshada (kaalmada qoyska iyo hawlgabka)
- difaaca
- ganacsiga iyo baayacmushtarka
- madaarka iyo amniga hawada
- arrimaha dibada (xidhiihda iyo wadamada).

### Xukuumadaha ayaa ugu horreyn ayaa mas'uul ka ah dawlad goboleedka iyo territoriska:

- cusbataalada iyo adeegyada caafimaadka
- dugsiyada
- wadooyinka iyo tareenada
- kaymaha
- adeegyada booliska iyo ambalaaska
- Gaadiidka dadweynaha.

### Xukuumada dawlada hoose (iyo xukuumada Territoriga Caasumada Australia) waxay masuul ka tahay:

- calaamadaha wadooyinka, kantaroolida baabuurta
- wadooyinka xaafadaha, wadada lugta ah, biriijyada
- biya-mareenada
- Baararka, meelaha carruurtu ku ciyaarto, barkadaha dabaasha, dhulka isboortiga
- dhulka dibad baxa loo tago iyo baararka karafaanda
- kormeerida cunatada iyo hilibka
- kantaroolka buuqa iyo xayawaanka
- qaadista xashiishka
- maktabada xaafadaha, xarumaha bulshada iyo goobaha shirarka
- Daryeelka-dhalaanka qaarkiis, iyo arrimaha daryeelka dadka da'da ah
- ogolaanshaha dhismaha
- qorshaynta bulshada
- arrimaha degaanka xaafadaha.

# Doorkee xisbiyada siyaasado ka cayaaraan sida Australia loo xakumo?

Xisbiga siyaasadeed waa koox dad ah oo wadaaga aragtiyo isku mid ah oo ku saabsan sida wadanka loo xakumayo. Wadajir ayay u wada shaqeeyaan si aragtida xisbiga loogu rogo sharci. Xisbiyada siyaasadeed ee ugu waaweyn Australia waa Xisbiga Liberalka (Australian Liberal Party) ee Australia, Xisbiga Shaqaalaha Australia (Australian Labor Party), Muwaadiniinta (The Nationals) iyo Greens-ka Australia (Australian Greens).

Xubnaha baarlamaanka badankood waxay ka tirsan yihiin xisbiyo siyaasadeed. Xubnaha baarlamaanka qaarkood kama tirsana xisbi siyaasadeed waxaan loogu yeedhaa 'independents'.

Australiya gudaheeda, waxaad xor u tahay inaad ka qaybgashid xisbigaad doorato.

# Sidee lagu dhisaa xukuumada Australia?

Doorashada fedaraal ka dib, dawalada Australiya waxaa siguud u sameeya xisbiga siyaasadeed ama xisbiyada xulafada ah xubnaha ugu badan ku yeesha aqalka wakiilada. Hogaamiyaha xisbigan ayaa noqda hogaamiyaha xukuumada Australiya, Raiisal Wasaare.

Xisbiga iyo xisbiyada xulafada ah oo ku xiga xisbiga ugu tira badan aqalka wakiilada ayaa noqda xisbiga mucaaradka. Hogaamiyahooda waxaa loogu yeeraa hogaamiyaha mucaaradka.

Raiisal Wasaaruha ayaa soo jeediya mudanyaasha Aqalka Wakiilada ayaa ee noqdaan wasiiro kujira Dawlada Australiya. Wakiilka Guud ee Boqortooyada ayaa oggolaadaa magacaabista Raiisal Wasaaraha iyo wasiirrada.

Wasiirada dawlada ayaa masuul ka ah hay'adaha waaweyn ee xukuumada (waxaa loogu yeeraa masuuliyaad) sida shaqada, arrimaha dadka asaliga ah, ama Maaliyada. Wasiirada ugu masuuliyada weyn waxay noqdaan Kabaneet (Cabinet), kuwaas oo noqda kuwa talada xukuumada Australiya ka go'do.

# Sidee sharciga loo sameeyaa?

Baarlamaanka Australiya wuxuu sameeyaa oo wax ka bedelaa sharciga si loogu faaiideeyo ummada.

Xubin ka tirsan Baarlamaanka Australiya ayaa soo jeedin karta sharci cusub ama bedelaada sharciga jira, soo jeedintan waxaa loo yaqaan 'Bill'.

Aqalka Wakiilada iyo Mudanayaashu waxay eegaan, ka doodaan codna ka bixiyaan inay ogol yihiin biilka iyo in kale.

Haddii inta badan ee aqalka wakiiladu isku raacaan biilka, waxaa loo diraa Wakiilka Guud ee Boqorada.

Wakiilka Guud ee Boqortooyada ayaa saxeexa Bill ku inuu noqdo sharci. Tan waxaa loogu yeedhaa 'Royal Assent'

Baarlamaanada dawlad goboleeyada iyo territoriska waxay sameeyaan sharcigooda si isku mid ah.




# Sida sharciga loo fuliyo?

## Maxkaddaha

Maxkamadaha Australiya waa madaxbanaan yihiin. Maxkamadah ayaa go'aan ka gaadha haddii qof sharciga jebiyo ama aanu jebin iyo go'aanka ciqaabtana. Maxkamadaha waxay go'aankooda ku saleeyaan caddaynta hortooda taal.

## Xaakimada iyo qaadiyada

Xaakimka ama qaadigu waa awooda ugu sarreysa maxkamada. Xaakimada iyo qaadiyadu waa madaxbanaan yihiin cidina uma sheegi karto go'aanka la gaarayo.

Xaakimada iyo qaadiyada waxaa magacaaba xukuumada, laakiin dawladu booska kama qaadi karto haddii ay ku tala diidaan go'aankooda.

## Xeerbeegta

Sida nidaamka maxkamaded ee Australiya, dadka waxaa loo arkaa qaar aan dembi laheyn ilaa maxkamadi ku hesho dembi. Qof walbaa wuxuu xaq u leeyahay in uu matalo maxkamada garyaqaan.

Maxkamadu waxay isticmaashaa xeerbeeg kaysaska qaarkood si go'aan looga gaaro haddii qof sharciga jebiyey. Doorka xeerbeegtu waa inuu go'aan ka gaadho maxkamada haddii qofku aanu dambi lahayn ama dambiile yahay. Xeerbeegtu waa koox dad Australiyaan caadi ah oo si aan kala sooc lahayn looga doortay dadweynaha guud. Xaakimku wuxuu sharxaa sharciga xeerbeegta. Dacwadaha dembiyeed, haddii xeerbeegtu ku hesho qofka dembi, xaakimku wuxuu go'aansadaa ciqaabta.

## Booliiska

Booliisku wuxuu ilaaliyaa nabada iyo kala dambaynta bulshada. Waa masuuliyadooda ilaalinta naftaada iyo hantidaada. Waa ay ka madaxbanaan yihiin dawlada. Haddii booliisku aaminsan yahay in qof sharciga jebiyey, way xiri karaan waxayna hor keeni karaan maxkamad. Booliisku waxay ka bixin karaan caddayn maxkamada, laakiin maxkamada ayaa gaarta in qof dembiile yahay iyo in kale.

Dawlad goboleedka iyo territoriska waxay leeyihiin booliiskooda. Waxay dambiyada u eegaan sharciga gobol iyo territoriyada.

Australiya waxay kaloo leedahay ciidan qaran oo loogu yeero booliiska federaalka ee Australiya (Australian Federal Police (AFP). Booliiska federaalka AFP ah wuxuu baadhaa dembiyada ka soo horjeeda sharciga federaalka ah, tusaale ahaan daroogada, dembiyada qaranka ka soo horjeeda iyo dembiga ka soo horjeeda bay'ada. Booliiska Federaalka Australiya AFP wuxuu kaloo masuul ka yahay shaqada booliiska ee guud ee Territoriga Caasumada Australia (Australian Capital Territory).

Booliiska iyo bulshadu Australia waxay leeyihiin xiriir fiican. Waxaad soo sheegi kartaa dembiyada waxaadna raadin kartaa caawimada booliiska agtaada ah.

Australiya gudaheeda, waa dembi aad u weyn inaad laaluushtid booliis. Waa dembi inaad xataa u soo jeediso inaad lacag siiso booliiska.

## Gaf dembiyeedka Australia

Muhiim bay kuu tahay inaad wax ka taqaan sharciga Australiya. Haddii aad jabis sharciga Australiya oo aanad ogeyn, waxaa lagugu soo oogi karaa dacwad, maadaama aanad aqoon u lahayn sharciga marmarsiinyo ma leh.

Qaar ka mid ah dembiyada ugu waaweyn dembiyada waxaa ku jira dilka, qof wax u geysashada, faraxumaynta, rabshada qof ka soo horjeeda ama hanti, hub wax ku dhicida, u galmoodka carruur yar oo ka yar da'da sharciga ah ee ay ku ogolaan karaan, khatar u wadida gaari, haysashada iyo isticmaalida daroogo khatar ah iyo wax isdhaafin.

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu la kulmo xiriir wanaagsan oo aamin ah qoysaskiisa, asxaabtiisa iyo kuwa uu jecel yahay. Sida wadamada kale, rabshad qof kale loo geystay waa sharci daro Australia waana dembi aad u weyn. Tan waxaa ku jira rabshad guriga ka dhacda xagga guurka, kaas oo loo yaqaan rabshada guriga ama qoyska. Rabshadaha guriga iyo qoyska waxaa ka mid ah dabeecado ama hanjabaado ujeedadoodu tahay in lagu xakameeyo lammaanaha iyada oo sababaysa cabsi ama khatar ku ah ammaankooda. Shaqaaqada guriga iyo qoyska waxaa ka mid noqon kara garaacid, ka reebitaanka xubin qoyska ka mid ah asxaabta iyo qoyska, ama u hanjabida carruurta ama xayawaanka rabaayadda ah. Rabshada guriga iyo qoyska lama aqbali karo waxayna ka soo horjeedaa sharciga.

Qofka gala dambiyadan ayaa xabsi gelin kara, ha ahaadeen nin ama naag.

Qofna ma aqbali karo in si xun loola dhaqmo ama waxyeello loo geysto. Haddii adiga ama qof aad taqaanid khatar ku sugan tahay waa inaad la xiriirtaa booliska. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa www.respect.gov.au iyo www.1800respect.org.au

## Gafafka wadada

Wadada iyo shuruucda wada marida waxaa kantaroola xukuumadaha dawlad goboleedka iyo territoriska. Dadka waxaa lagu ganaaxi karaa lacag badan ama xataa waxaa loo diri karaa xabsi jebinta sharciga wada marida. Si aad gaari ugu wado Australia, waxaa waajib kugu ah inaad haysato laysanka gaari wadida si aad gaari u wado gaariguna waa inuu diiwaangashan yahay.

Qof walba oo gaari ku safraya waa inuu xidhaa suunka kursiga. Carruurta iyo ilmaha yar waa inay ku xidhan yihiin kursi gaadhi oo la ansixiyey. Sharciya wadooyinku aad bey u adag yihiin. Waa sharci darro inaad baabuur waddid ka dib qaadashada daroogada ama haddii aad ka sarreysid xadka khamriga dhiigga loo xadidey. Sidoo kale sharciga waa ka soo horjeedaa inaad ku hadasho moobaylka gacanta lagu qabto markaad gaadhiga wado.



# QAYBTA AFARAAD

## Qiyamka Australiya



# Qiyamka Australiya

Qiyamka Australiyaanka ee ku saleysan xorriyadda, ixtiraamka iyo sinnaanta ayaa udub-dhexaadka u ah Australiya oo weli ah bulsho aamin ah, barwaaqo leh oo nabdoon.

Qiyamkeenu wuxuu qeexayaa oo qaabeeyaa wadankeena waana sababta ay dad badani u doonayaan inay noqdaan muwaadiniin Australiya ah.

Dhalashada Australiya waxay ku saabsan tahay ku noolaanshaha qayimkaas nolol maalmeeddkaaga iyo bulshada dagaankaaga. Sidaas darteed aad ayey muhiim u tahay inaad fahanto qiyamka laga rabo dhammaan dadka Australiyaanka ah inay ixtiraamaan, wadaagaan oo ay ilaashadaan.

## Qiyamkeena

### U heellanaanta Xukunka Sharciga

Dhamaan Australiyaanka waxaa ilaaliya sharciyadayada iyo nidaamyada sharciga. Australiyaanku waxay aqoonsadaan muhiimada sharciyada in la joogteeyo jawi nabdoon oo nidaamsan.

Marka aa u eegno Xukunka Sarciga, dhamaan dadka reer Australiya waa siman yihiin sharciga hortiisa mana jirto koox sharciga ka sarraysa.

Australiya gudaheeda, qof walba waa inuu adeecaa sharciga oo uusan jebin waqti kasta, haddii kale waxaad la kulmi doontaa ciqaab. Waa inaad raacdaa sharciga xitaa haddii aan qofna ku eegeen. Sharciyada Australiya waxa uu quseeyaa dadka Australiya oo dhan. Tan micnaheedu waa iyada oo aan loo eegin asalkaaga ama dhaqankaaga, waa inaad raacdaa sharciyada Australiya.

### Dimoqraadiyada baarlamaaniga ah

Australia nadaamkeeda xukuumadeed waa hab baarlamaan oo dimoqraadi ah. Sharciyadeena waxaa xukuma baarlamaanno ay dadku doorteen. Taas macnehedu waxa weeye in dhamaan dadka reer Australiya ay ku lug leeyihiin sida wadanka loo maamulo. Awooda dawlada waxay ka timaadaa shicibka Australiyaanka ah sababtoo Australiyaanka ayaa si joogto ah cod u siiya cida ay dooranayaan inay u matasho baarlamaanka.

Codbixintu waa khasab doorashooyinka Australiya. Tani waxay muujineysaa ahmiyada ay leedahay ka qeybgalka doorashooyinka.

## Xoriyada hadalka

Dadka Australiyaanka ah waa inay awoodaan inay si xor ah u muujiyaan fikradahooda, ilaa inta ay sharciga ku dhex jirto. Australiya gudaheeda, dadku waa u xor inay ku kulmaan goobaha dadweynaha ama meelaha gaarka loo leeyahay si looga wada hadlo arrimaha bulshada ama siyaasadeed. Xoriyada hadalku waxay u ogolaataa dadka inay yiraahdaan ama qoraan waxay aaminsan yihiin kalana hadlaan aragtidooda kuwa kale. Jaraa'idka, telefishanka iyo raadiyaasha ayaa leh xuriyad isku mid ah.

Dadka Australiyaanka ah waxaa loo oggol yahay inay ka mudaaharaadaan ficilada dawladda, sababta oo ah u dulqaadashada banaanbaxyada nabadeed ee nabdoon waa qayb muhiim ka ah dimoqraadiyadda.

Maaha wax la aqbali karo in la dhiirrigeliyo rabshado ka dhanka ah qof kale ama koox dad ah (sida dhaqankooda, qowmiyaddooda, diintooda ama asalkooda) maxaa yeelay waxay ka soo horjeedaa qiyamka iyo sharciga Australiya. Sidoo kale waa sharci daro in laga sameeyo eedayn beena ama in uu dhiirigeliyo kuwa kale inay jebiyaan sharciga. Waxaa waajiba in aan ixtiraamno dadka kale xoriyadooda hadalka iyo xoriyadooda dareen muujinta inta dareen mujintana ay tahey sharci.

## Xoriyada jimciyada

Australiya gudaheeda, dadku waxay xor u yihiin inay ku biiraan ama ka baxaan kooxkasta iskood maadaama uu sharciga uu yahey. Australiyaanku waxay xor u yihiin inay ka tirsanadaan urur kasta oo sharci ah, sida mid siyaasadeed, shaqaale, diimeed, dhaqan ama kooxo bulsho. Shakhsiyaadka laguma qasbi karo inay ku biiraan urur ama laguma qasbi karo inay ka baxaan.

Australiyaanku waxay ku darsami karaan kuwa kale si ay mudaaharaad uga sameeyaan go'aan dawladu gaartay ama urur. Si kasta ha ahaatee, mudaaharaad kastaa waa inuu yahay mid sharciga waafaqsan. Taas macneheedu waxa weeye in dadku u sameeyaan si nabad ah waana in aanay waxba yeelin cidna ama hanti cidi leedahay.

## Xoriyada diimta

Australiya ma laha diin qaran oo rasmi ah dadka Australiyaana way u madax banaan yihiin inay raacaan diin kasta oo ay doortaan. Xukuumadu waxay ula dhaqantaa dadka oo dhan si siman, diin iyo caqiida kasta oo ay haystaan. Sikastaba, ku dhaqanka diinta waa in aanu jabin sharciga Australiya.

Shuruucda diimeed Australiya sharci kuma leh. Sharciga Australia waa inuu raacaa qof kasta oo Australiya jooga, oo ay ku jiraan meesha ay kaga duwan tahay sharciyada diinta. Diimaha qaarkood ama ku dhaqanka, sida guurka ka badan hal xaas isku mar waxay ka soo horjeedaa sharciga Australiya waxaana ka dhalan kara ciqaabo sharci ah oo daran, oo ay kujirto xabsi.

Dulqaadasho laan diimeed lama aqbali karo bulshada Australiya gudaheeda. Dadka oo dhan waa in la siiyaa fursad isku mid ah oo ay ku raadsadaan himilooyinkooda iyo danahooda iyada oo aan loo eegin jinsiyadooda ama diintooda illaa iyo inta ay adeecayaan sharciga Australiya.



## Sinnaanta dadka oo sharciga waafaqsan

Bulshada Australiya waxay qiimeysaa xuquuqda loo siman yahay ee dadka oo dhan, iyadoon loo eegin jinsiga, nooca galmada, da'da, naafonimada, diinta, jinsiyadda, ama asalka qaran ama jinsi.

Waxaa jira dhowr sharci Australiya gudaheeda kuwaas oo xaqiijiya in qof aan loola dhaqmin si ka duwan ku kale. Sharciga waxaa laga dhaqan geliyaa Australiya si dadka ka soo jeeda asal ahaan aan loo kala eexan, ama aan loo takoorin. Tusaale ahaan, Buddhist iyo dadka haysta diimaha kale oo dhan waxay helaan macaamil la mida Masiixiyiinta. Sharciyadeenna, laba qof ayaa is guursan kara, oo ay ku jiraan guurka labada nin ama laba haween ah.

Ragga iyo haweenku waxay leeyihiin xuquuq isku mid ah Australiya gudaheeda waana in la siiyaa fursad isku mid ah si ay ula socdaan himilooyinkooda iyo danahooda. Ragga iyo haweenkuba waxay si siman u leeyihiin waxbarashada iyo shaqada, waxay u codeyn karaan doorashooyinka, u istaagi karaan baarlamaanka, ku biiri karaan Ciidamada Difaaca Australiya iyo booliiska, waxaana loola dhaqmaa si isku mid ah maxkamadaha sharciga.

Waxay ka soo horjeeda sharciga in qof la takooro sababa la xidhiidha jinjigiisa. Australiya gudaheeda, waa xaq in naagtu ay shaqo ka hesho ragga hortiisa, haddii ay leedahay aqoon iyo xirfado fiican.

Raga iyo dumarku waxay leeyihiin xaqa ay ku sameeyaan go'aan iyaga u gaara wixii ku saabsan arrima shakhsiyeed sida guurka, waxaana xafida sharciga in aan lagu samayn cabsi gelin iyo rabshad. Maya, maxaa yeelay rabshadaha jireed ee loo geysto xaaska waa fal dambiyeed Australia gudaheeda.

Furriinku waa mid laga aqbali karo Australiya gudaheeda. Ama nin ama naag ayaa furiin u dalban kara maxkamadaha, xitaa hadii qofka kale uu doonayo inuu sii wado guurka.

## U-sinaanta fursadaha iyo 'ku socod cadaalad 'fair go'

Waxaan aaminsanahay in qof walbaa u qalmo 'cadaalad ah' dadkuna waa inaaney ku koobnaan nooc kasta oo kala soocid ah. Qof walba, iyadoon loo eegin asalkooda, waxaa la siiyaa fursad loo siman yahay si loo gaaro guusha nolosha, iyo in la hubiyo in qof walba uu leeyahay xuquuq isku mid sharci ah waa arrin muhiim u ah caddaaladda bulshada Australiya.

Waxa qof ku gaadhayo nolosha waa inuu ku yimaadaa dadaalkiisa iyo hibada uu u leeyahay. Tani micnaheedu waa qofku inuu helo shaqo ku saleysan xirfadiisa iyo waaya aragnimadiisa, oo aan ku xirnayn jinsi ahaan, maalkiisa ama jinsiyadiisa.

Marka hay'a u baahan yahay inuu buuxiyo shaqo, sharciga ayaa taageeraya inay doortaan qofka leh xirfadaha ugu fiican iyo khibradda shaqada.

Soogalooti badan oo ku cusub Australiya waxay noqdeen hogaamiyeyaasha ganacsiga, xirfadooda, farshaxanka, adeega bulshada iyo isboortiga iyagoo u maraya shaqadooda adag iyo ganacsiga.



## Is ixtiraam iyo dulqaad dadka kale

Australiya gudaheeda, shaqsiyaadku waa inay xushmeeyaan xorriyadda iyo sharafta dadka kale, iyo fikradahooda iyo xulashooyinkooda.

Waa sharci daro in lagu xadgudbo qof kale. Rabshadaha noocuu doono ha ahaadee, oo ay kujiraan af iyo adinba, waa sharci daro. Dadka Australiyaanka ah waxay rumeysan yihiin is afgaranwaaga nabadeed iyo wixii ka sarreeya xuquuqda oo dhan inay nabad qabaan oo ay ka xoroobaan rabshad iyo cabsi gelin

Australiya gudaheeda, waxaa jira sharciyo aad u adag oo khuseeya da'da ogolaanshaha galmada, oo ah 16 ama 17 taas oo kuxiran gobolka ama teratoriga aad degantahay. Tusaale ahaan, Australiya dhexdeeda, nin 20 jir ah lama lahaan karo xidhiidh galmo ah gabadh 15 jir ah, maxaa yeelay taasi waxay ka soo horjeedaa sharciga dhammaan dowlad-gobolleedyada iyo territoriyada oo dhan.

Australiya gudaheeda, ficillada sharci ee booliis waa in la taageeraa. Waa inaad adeecdaa codsi sharci ah oo laga helo booliiska, maxaa yeelay dhamaan dadka Australiyaanka ah waxay balanqaadaan inay sharciga raacayaan.

Qayimka Australiya mabaadiida is ixtiraam iyo dulqaad Tan micnaheedu waxaa weeye dhageysiga dadka kale iyo ixtiraamka rayigooda iyo aragtidooda, xitaa marka ay ka duwan yihiin kuwaaga.

Dadku waa inay isu dulqaataan markay ogaadaan inay diidan yihiin. Midab takoorku meel kuma laha Australiya. Tan waxaa ka mid ah abuurista ama wadaagista waxyaabaha cunsuriyadda ku ah internetka ama qoraalada kale iyo ka dhiibashada faallooyinka isir naceybka ah meel fagaare ah ama munaasabad isboorti.

# Bulshadeena

## Ka qayb qaadasho

Jinsiyadda ayaa ku siinaysa fursad aad si buuxda uga qaybqaadato nolosha ummaddeena iyo bulshadeeda. Waxay ka dhigan tahay inaad diyaar u tahay gudashada waajibaadkaaga muwaadin Australiyaan ah. Dadka Australiyaanka ah waxay filayaan in qof walba oo ku nool Australia inuu kaqeyb qaato bulshadeena waxna ku biirin bulshadayada. Qof kastaa wuxuu leeyahay masuuliyadiisa inay iskudayaan oo taageeraan naftooda iyo qoysaskooda markay awoodaan inay sidaas sameeyaan.

## U-naxariisashada kuwa baahan

Australiyaanku waxay qiimeeyaan saaxiibtinimo 'mateship'. Taas macneheedu waxa weeye waan is caawinaa marka baahiyi jirto. Qof kastaa wuxuu leeyahay masuuliyadiisa inay iskudayaan oo taageeraan naftooda iyo qoysaskooda markay awoodaan inay sidaas sameeyaan.

Iyada oo loo eegayo saaxiibtinamada, Australiya waxay leedahay dhaqan adag oo adeegga bulshada ah iyo iskaa wax u qabso - in la iska ilaaliyo midba midka kale lana xoojiyo bulshada. Sidoo kale waa fursad fiican inaad la wadaagto aqoon, ka barato xirfad cusub, aadna kordhisid dhexgelka iyo dareenkaaga inaad ka tirsan tahay bulshada Australia. Waxaa jira fursado badan oo aad ugu tabaruci karto Australiya.

## Af-Ingiriisigu waa luqadda qaranka

Bulshada Australiya waxay u qiimeysaa luqadda Af-Ingiriisiga inay tahay luuqadda qaran ee Australiya, iyo inay tahay shey mideysan oo muhiim u ah bulshada Dadka ku nool Australiya waa inay sameeyaan dadaal ay ku bartaan Af-Ingiriisiga.

Waa muhiim in la barto ku hadalka Af-Ingiriisi maxaa yeelay waxay gacan ka geysataa helitaanka waxbarasho, shaqo, iyo ku wanaagsanaanta dhexgalka bulshada. Waxay lagama maarmaan u tahay ka qaybgalka dhaqaalaha iyo wadajirka bulshada. Codsadeyaasha dhalashada Australiya waa inay qaadaan dadaallo macquul ah oo ay ku bartaan luqadda Af-Ingiriisiga, haddii aysan ahayn afkooda hooyo.

## Caawinta sidii loo badbaadin lahaa bulshadeena

Australia gudaheeda, mid walbaa waxaan leenahay waajibaad si aan u ilaalino bulshada Australiya. Tusaale ahaan, haddii dadka Australiyaanka ah ay ka shakiyaan in saaxiibkood ama deriskooda ay damacsan yihiin inay dambi culus galaan, waa inay ku wargeliyaan mas'uuliyiinta dawladda Australia sida ugu dhakhsaha badan. Sidan, waxaan gacan ka geysan karnaa ilaalinta bulshadayada.

Sidoo kale, haddii qof Australiya jooga uu arko ama aqoon u leeyahay ilmo lagu xadgudbay, waa inay tan u sheegaan booliiska si ay u baaraan.

Ku xadgudubka khadka tooska ah lama aqbalo Australiya. Tan waxaa mararka qaarkood loogu yeeraa xadgudubka internetka. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah wadaagista sawirrada galmada ama fiidiyowyada khadka tooska ah ogolaansho la'aan, cayrsiga qofka khadka tooska ah, ama faallooyinka cunsuriyadda ku saabsan qofka ee internetka. Noocyo badan oo ka mid ah xadgudubka internetka ayaa sharci darro ka ah Australiya.

## Daacad u ahaanshaha Australiya

Munaasabada dhalashada, waxaad ballanqaaday inaay daacad u ahaanayso Australiya iyo dadkeeda. Muwaadiniinta Australiyaanka ah waxay kaloo lahaan karaan dhalashada wadan kale ama wadamo hadii sharciyada wadamadaas oggol yihiin. Tan waxaa loo yaqaan laba (dual), ama dhawar (multiple), dhalasho. Si kastaba ha noqotee, xitaa haddii qofku sidoo kale yahay muwaadin waddan kale, muwaadin Australiyaan ah oo Australiya gudaheeda ku nool waa inuu raacaa dhammaan sharciyada Australiya markasta. Shuruucda Australiya qaarkood waa inay sidoo kale raacaan muwaadiniinta Australiyaanka ah xitaa markay dibedda joogaan. Tusaale ahaan, waa sharci darro Australiyaanku inay ku lug yeeshaan wax galmo ah, halkan ama dibada, oo ay la yeeshaan ilmo ka yar 16 sano.

Bulshada Australiya waxay ku saleysan tahay waajibaadkayaga la wadaago ee ah inaaney wiiqin danaha iyo nabadgelyada Australiya. Tusaale ahaan, adeegsiga warbaahinta bulshada si loo wadaago siraha dowladda ee rasmiga ah waxay wax u dhimeysaa danaha Australiya. Sidoo kale, kobcinta aaminaada iyo cabsida bulshada qowmiyadeed waxay dhaawaceysaa xidhiidhka bulshada Australiya.

Australiya gudaheeda, waxaan isugu nimidnaa waqtiyada dhibaatada waxaanna is daryeeleynaa waqtiyada wanaagsan iyo kuwa xunba. Intii lagu gudajiray dabkii baadi-doonka ahaa ee Australia xilli 2019-20, oo sababay khasaaro nafeed, hanti iyo duurjoog, iyo baabi'inta deegaanka, bulshooyin badan oo dhaqamo kala duwan ka shaqeeyeen aruurinta lacag, dhar iyo tabarucaad raashin ah si loogu caawiyo dadka ay saameeyeen dababkii duurka. Tusaale ahaan, xubnaha bulshada Shiinaha, Fiyatnaamiska iyo Kambodiyaanka ee Fiktooriya waxay soo ururiyeen tabaruc xarumaha wax lagu iibsado waxayna lacag ugu uruuriyeen xafladaha kooxda deegaanka, xubna ka tirsan bulshada Sikh ayaa kumanaan dhalo biyo ah ugu deeqay bulshooyinka iyo dab-demiyayaasha ee Queensland.



# Gabagabo

Hay'adaheena dimoqraadiga ah iyo qayimka Autraliya ee aan wadaagno waxay abuureen bulsho degan oo nabadeed.

Waxaan leenahay dhaqan keli ah oo qani ah lana wadaago. Muwaadin Australiyaan ahaan, waxaad qayb ka noqon doontaa sheekada qarankeena waxaad door ka qaadan doontaa mustaqbilkeena. Asutralia waa ku soo dhowanaysaa. Dhalashado waa waxa isku keen xira.

# Sharaxaada macnaha qaybta la isku imtixaani karo

Aborijinaalka iyo dadka jasiiradaha ka yimid.

Aborijinaalka iyo dadka ka yimid jasiiradaha Torres Strait ayaa ah dadkii wadanka loogu yimid – Australiya,
*Aborijinaalka iyo dadka ka yimid jasiiradaha Torres Strait waxay matalaan boqolkiiba saddex tiradda umadda Australiya.*

Guddiga Xuquuqda Aadanaha Australiya

Guddi madaxbanaan oo baaraya cabashooyinka la xiriira takoorka iyo ku tumashada xuquuqda aadanaha.
*Dhacdooyinka cunsuriyada waxaa looga warbixin karaa Hay'ada Xuquuqul Insaanka Australia.*

Adeega dadweynaha Australia

wasaaradaha dawlada iyo dadka ay shaqaaleeyaan
*Paul wuxuu ka hellay shaqo Adeega Dadweynaha sarkaalka Services Australia ahaan.*

kicida dadweynaha

mudaahiraadka iyo dibad baxa dad badani sameeyaan, badanaana looga dacwoonayo go'aanada dawlada ama siyaasada
*Waxay jiray degaan la'aan dadweyne markii dawladu soo saartay go'aan sharcigii aan la soo dhowayn.*

isbahaysi

xulafadaku biirida hal xisbi ama xisbiya badan oo siyaasadeed, badanaa si ay u sameeyaan dawlad ama mucaarad
*Doorashada ka dib, ma jirin xisbi leh aqlabiyad Aqalka wakiilada, sidaas darteed laba xisbi oo isku fikrad ah ayaa isu tegay si ay u sameeyaan xulafo.*

guddi

koox dad ah oo ay saaran tahay masuuliyad rasmi ah
*Guddi madax banaan ayaa qabanqaabiya doorashooyinka.*

Dastuurka

sharciga ugu sarreeya ee Australiya oo ay tahay in dawladdu u hogaansanto
*Dastuurku wuxuu dejiyaa sharci-dejinta, fulinta, iyo awoodaha garsoorka.*

boqortooyo distuuri

waa wadan boqor ama boqorad ay yihiin madaxa dawlada, awoodaheedana waxaa xadada Dastuurka
*Distuurkeenu wuxuu u asaasay Barwaaqasooranka Australiya hab boqortooyo oo distuuri ah, kaas oo Boqorka ama Boqorada Ingiriisku yahay Madaxa Dawlada.*

maxkamad

meel kaysaska sharciga ah uu ku dhegaysto xaakim ama qaadi
*Marka dadku jebiyaan sharciga, waxay aadaan maxkamada.*

dacwad dembiyeed

maxkamada dhegaysanaysa xaqiiqada ku saabsan dembiga lagu soo eedeyey si go'aan looga gaaro haddii qof dembi leeyahay ama aanu lahayn
*Dacwada dembiyeed ka dib, qofka bangiga dhacay waxaa loo diraa xabsi.*

xadgudubka internetka

Akhlaaqda u isticmaasha tikniyoolajiyada hanjabaad, cabsi gelin, dhibaatayn ama bahdilaad qof iyada oo looga dan leeyahay in lagu waxyeeleeyo.
*Noocyo badan oo ka mid ah ku xadgudubka internetka ayaa ka soo horjeedda sharciga Australia waana in lagu wargaliyaa booliska iyo adeegga qadka, sida barnaamijyada warbaahinta bulshada, ee ay ku dhacday.*

**dimoqraadiyad**
xukuumada waxaa leh dadka iyaga oo doortay wakiilada
*Grace way faraxsanayd inay ku nooshahay dimoqraadiyad meel ay codka siin kartay wakiilkeeda baarlamaanka.*

**rabshadaha qoyska iyo qoyska**
Dabeecad ama hanjabaad ujeedadeedu tahay in lagu xakameeyo lammaanaha iyada oo sababi karta cabsi ama cabsi gelinaysa ammaankooda. Rabshada guriga iyo qoyska lama aqbali karo waxayna ka soo horjeedaa sharciga.
*Rabshada guriga iyo qoyska waxay ka soo horjeedaa sharciga Australia waana in lagu wargaliya booliska.*

**ka ganacsiga daroogada**
qaadida ama iibsashada daroogo si sharci daro loogu gado
*Jess waxay loo diray xabsi ka ganacsi daroogo darteed.*

**doorasho**
hannaan la maro kaas ay muwaadiniintu doortaan dadka ku matalaya baarlamaanka
*Muwaadin Australian ah oo jira 18 sano ama ka weyn waa inuu ka qaybgalo doorashada.*

**liiska doorashada**
liiska dad qoran inay cod ka bixiyaan doorasho ama distuurka
*Marka Jan timid xarunta codbixinta, sarkaalku wuxuu ka raadiyey magaceeda liiska codbixinta.*

**codbixiye**
degmooyinku waxay ka kooban yihiin cod bixiyayaal u codeeya inay doortaan siyaasiyiinta Golaha Wakiilada
*Codbixiyaasha waxaa lagu magacaabaa degmooyinka doorashada, qeybaha, ama kuraasta.*

**sinaanta**
isku mid xaalad ahaan
*Australiyaanku waxay rumeysan yihiin sinnaanta dadka oo dhami.*

**meelmarinta sharciga**
si loo xaqiijiyo in dadku raacaan sharciga
*Booliisku wuxuu meelmariyaa sharciga wuxuuna xafidaa nabada.*

**awooda fulinta**
awooda iyo amarka lagu fuliyo sharci, mid ka mid ah saddex awoodood sida waafasaqsan distuurka Australia
*Xukuumada Australia wasiiradeeda iyo wakiilka guud waxay leeyihiin awood fulineed si ay ugu maamulaan sharciga uu sameeyey baarlamaanka Australia.*

**cadaalad**
qof kasta, iyada oo aan loo eegayn asalkiisa, waxaa la siiyaa fursad isku mid ah oo lagu gaaro guusha nolosha
*Australiya gudaheeda, waxaana aaminsanahay qofkast uu u qalmo cadaalad 'fair go'.*

**isu-darsanka**
midowga goboladii la gumeysanjorey oo isku noqday hal wadan iyadoo gumeystuhu haya awooda qaar
*Sanadii 1901, degaanada waa la mideeyey waxaana laga dhigay isu-tag loogu yeero Barwaaqa sooranka Australia.*

**Kooxdii Ugu Horraysay**
kooxdii 11ka markab oo ka soo kicitimay Ingiriiska uuna horkacayo Dhame Arthur Phillip inuu ka asaaso degitaan dad dembiilayaal ah New South Wales
*Kooxdii Ugu Horraysay wuxuu kasoo degey Sydney Cove 26dii Janaayo 1788.*

**astaanta Ubaxa**
ubaxa Qaranka
*Astaanta ubaxa waa geedka loo yaqaan wattle-ka oo dahabi ah.*

**Guur la khasbey**
guur halkaas oo mid ama lammaanuhu aaney lahayn ikhtiyaar a xor u yahiin
*Waligeed kuma faraxsaneyn guurkeeda khasabka ah marwalbana waxay rabtay inay ka tagto.*

haddeer laga bilaabo

haddeer laga bilaabo iyo mustaqabilka

*Munaasabada dhalashada, waxaad ballanqaaday inaad daacad u ahaato Australia laga bilaabo haddeer.*

astaan wax u taagan

muuqaal caan ah

*Opera House (aqalka Opera) waa astaanta Sydney ay caanka ku tahay.*

Dadka Asaliga ah

Aborijinaalka iyo dadka ka yimid jasiiradaha Torres Strait.

*Australiyaanka asaliga ah waa Dadka ugu Horreeya ee dalkan.*

is-dhexgalka

habka laqabsashada muhaajiriinta si ay uga qeybqaataan ugana daraan noloshooda cusub ee bulshada

*Mudo marka laga joogo, muhaajiriintu waxay ka faa'iideystaan is dhexgalka Australiya iyo bulshada maxalliga ah.*

awooda cadaalada

awooda iyo amarka lagu tarjumo laguna dabakho sharciyada, mid ka mid ah saddexda awoodood sida waafaqsan distuurka Australia

*Maxkamadaha Australiya waxay leeyihiin awooda cadaalada.*

awooda sharci samaynta

awooda iyo amarka lagu sameeyo waxna looga bedelo sharciga, mid ka mid ah saddexda awoodood sida waafaqsan distuurka Australia

*Sida waafaqsan distuurka, baarlamaanku wuxuu leeyahay awood sharci samayneed.*

xoriyadaha (Xoriyad)

xorriyadda shaqsiyeed iyo madaxbanaanida

*Bulshadeena dimoqraadiga ah, dadku waxay leeyihiin xorriyadda hadalka, xorriyadda muujinta, xorriyadda diinta iyo xorriyadda isu imaatinka. Waanu qiimaynaa xoriyadaas.*

qaadiga

xaakim (hogaamiye) maxkamad hoose

*Qaadigu wuxuu ku hellay tuugga dembi wuxuuna u diray xabsiga.*

jaallnimo

caawinta iyo caawima ka helida kuwa kale, weliba waqtiyada adag

*Marka gaarigii iga jabay, dareewalada kale ayaa iga caawimay riixida si metship nimo ah.*

heesta calanka

heesta qaranka

*Heesta calanka Australia waa 'Advance Australia Fair'.*

Dimoqraadiyada baarlamaaniga ah

baarlamaan dimoqraadi ahnadaam dawladeed oo ku salaysan doorashada joogtada ah oo wakiilada ay ugu doortaan muwaadiniintu baarlamaanka

*Baarlamaan dimoqraadi ah, dadku waxay u codeeyaan wakiiladooda.*

xisbiyada siyaasadeed

koox dad ah oo wadaaga figrado isku mid ah oo ku saabsan sida dal loo maamuli lahaa oo badanaa raadiya in la doorto.

*Xubnaha xisbiyada siyaasadeed waxay u kulmaan joogto, tusaale, si ay uga wada hadlaan wanaajinta gaadiidka dadweynaha.*

cunsuriyada

cunsuriyad, takoorid, dhibaataynta ama nacaybka ayaa loo hayaa qof sababta oo ah sinjigiisa, midabkiisa, qarankiisa ama asal ahaan asal ahaan ka soo jeedaan

*Cunsuriyaddu waxay ka soo horjeedaa sharciga Australia waana in loo sheegaa booliska. Cabashooyinka sidoo kale waxaa loo gudbin karaa Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Australiya.*

refarandam
codka dhamaan codbixiyayaasha isbedel arrin la soo jeediyey in laga bedelo distuurka Australia
*Refarandamkii 1967dii, dadku waxay codkooda ku bixiyeen in lagu daro codbixinta Australiyaanka asaliga tirakoobka.*

wakiil siyaasadeed
wakiiladadad matala ama u hadla kuwa kale
*Wakiilada golaha degmada way jecelaadeen fikradayda waxayna ka sheegeen fadhiga golaha degmada.*

Ixtiraam
tus tixgelinta ciduun sidii qof ahaan, ama go'aan ay qaateen
*Emily waxay ku qanacday in qoyskeedu ay ixtiraamaan go'aankeedii ay ku noqotay Buddhist.*

Xeererka Sharciga
dadka oo dhan, oo ay kujiraan muwaadinku iyo dawlada, waxaa qabneya sharciga
*Qof kasta oo Australiya jooga, oo uu kujiro Raiisel Wasaaraha, waxaa qabaneya sharciyada Australiya ee hoos imanaya Xeerka Sharciga.*

codbixinta qarsoon
nadaam codbixineed oo dadku codka u bixiyaan si qarsoodi ah, sidaas darteed qofna ma marsiin karo inay codka ugu bixiyaan si gaara
*Codbixinta qarsoodiga ah, qofna ma eegayo markaad codkaaga bixinayso.*

cilmaani
ka durugsan diinta
*Ummadda cilmaaniga ah ma jirto diin rasmi ah oo leedahay.*

Isku-filaansho
awood u leh in aad siisid wax naftaadu u baahan tahay, iyadoon dadka kale aaney caawineyn
*Inuu shaqo helo waxay la micno tahay inuu iibsan karo cuntadiisa oo kiro u bixiyo. Waxuu ahaa mid isku-filaan.*

Adeegyada Australia
Hay'ad Dawlada Australiya ah oo ku bixisa adeegyo badan oo caafimaad, bulsho iyo daryeel iyada oo loo marayo Medicare, Centrelink, iyo Taageerada Ilmaha.
*Adeegyada Australia waxay ku bixisaa lacag bixinta taageerada Centrelink iyo adeegyo kale.*

dhigay
si loo dhiso, loo aasaaso, loo bilaabo
*Wakiilka Boqorada Phillip wuxuu ka asaasay degaankii ugu horreyyey New South Wales.*

tuullo
dawlada hoose
*Wadooyinka tuuladayda waa aamin.*

damaanada bulshada
lacagta hawlgabka ah ama lacagta lagu caawimo dadka aan shaqayn, iinta leh, dadka waayeelka ah iyo kuwa baahan
*Markii Trang ay lumisay shaqadeedii, waxay dalbatay damaanada bulshada.*

Xafiiska Canshuuraha Australia (ATO)
Hay'ad Dawlada Australiya ah oo maamusha nidaamyada canshuuraha iyo superannuation-ka ee taageera oo maalgeliya adeegyada Australiyaanka.
*Sannad kasta Australiyaanka badankood waxay u soo gudbiyaan canshuur celinta Xafiiska Canshuuraha ee Australia.*

qiyamka
mabaadiida qofka ka caawisa inuu go'aamiyo waxa saxda ah iyo waxa khaldan, iyo sida loogu dhaqmo xaaladaha kala duwan
*Australia waxay leedahay qiimeyaal la wadaago, oo aan ugu yeedhno qiyam Australiyaanka ah.*

tabaruce
qof siiya waqtigiisa qof ama urur isaga oo aan filanayn lacag
*Raza waa tabarucad ugu dhigta Ingiriis dadka guryahooda.*



# Dhamaadka qaybta su'aallaha la isku imtixaani karo